#IBNU KHALDUN ARAGTIDIISA DHAQAALE.

C/RAXMAAN IBNU KHALDUUN

ابن خلدون

133 0.M/730 ,H……Waxaan guda galeeynaa Kutubka sheeqa waxaana kasoo qaadan doonaa wax walba oow kaga hadlay dhaqaalahaWaxaana iga xusuusin ah in moowduuca aad u dheer yahay lkn waan sookoobi doonaa sidoo kale waxaa xusid mudan in oowsan jirin Kutub Muslim qoray oo lamid ah Kutubkiisa dhanka dhaqaalaha ,waxaana xusid mudan in oow yahay ruuxii ugu horeeyay ee ka hadlay dhaqaalaha sida oow uga hadlay ,Gaal uga hadlay majiro Muslim sii bayaaniyay , manoola mana soo marin dunida, Dr, Shakiib Al-arsalaani ayaa sharaxay lkn Dhaqaalaha kama hadlin ee waxa oow sharaxay

dhanka Taariiqda. Qaabka aan uqoraayo , waxaan soo ban dhigayaa fikirka sheqa waxaan ku lifaaqi doonaa wixii cusub ee quseeyo moowduucaas, wixi aan qaldo dib haloo saxo .

Taariiqdiisa oo kooban

1330,M.....730,H. waqtigaas ayuu ku dhashay wadanka Tuunis.

qooskiisa waxeey kasoo guureen wadanka Isbeeyn.

asal ahaan waxoow kasoo jeedaa Yemen waloow aan lacadeeyn karin in oow yahay asalkiisa Carab, lkn sheeko waxeey kusoo gaartay in oow Carab yahay.

1355,M. waxoow noqday nin xaasleh oo meel degan.

1365,M. safarkiisa ayuu badiyay oow ku maraayay Isbeeyn, Marooko, Aljeeyiya, Tuunis, Sudaan, Masar.

geeridiisa... 1400 ,M.....810,H. ayuu geeriyooday, Masar ayaa lagu aasay.

**

Siyaasada iyo Dowladii oow ku hoos noolaa

Dowlada oow ku hoos noolaa waxaa ladhihi jiray (Xafsiyiin)

Waxeey ka talin jireen

Tuunis, Jazaa`ir daanta bari ,Liibya gobolka lagu maga caabo

Barqa.

waxeey lawareegeen xukunka

1230 ,M. … 1570,M.

400 oo sano ayeey talada hayeen .

Dowlada weey duqoowdaa sida oow nabarayo Sheeqa.

400 sano ayeey kala dhaxlaayeen waxeey dagaal kula jireen

Muslimiin kale

Waa dhaqan Carbeed sidoo kale waa dhaqanka Somalida

Dadka qaar Roomaansi dhanka Siyaasada , Roomaansi dhanka

Taariiqda ah,

Roomaansi dhanka Qoomiyada ah (Qabiilka)

ayaa kudhacay waxeeyna ku lee yihiin waxaa dhulkeena qeeybiyay Gumeeysi oo xuduudahan waxaa sameeyay Gumeesi Bal aqri Taariiqdii gumeeysiga hortiis.

Walaal keey ayaan duulaan ku ahaa dilkiisa ayaan dan mooyad Ducuf-nimadiisa iyo in oow hanti beelo , Madaxtinimo aan ka ilaaliyo iyo in oow gurigiisa isaga kataliyo.

Sidaas ayaan dan mooday,waa taas natiijada aad ugu tegeeysid Taariiqdeena

Somali waxa eey eheeyd Gumeeysiga hortiis ruuxii doonayo, Tusaalooyin ha kasoo qaato Masar qaabkii looga dhaqmayay.Yaman waxa kasocday, Sacuudiga silica-yiilay, kadibna ha qiyaaso waxa eey ahaan kareen Somali dhanka ,xukunka , dhanka Siyaasada dhanka ,Dhaqaalaha.

Hadii aan ahay Carab taas waxeey dhashay in Wadamo badan eey Gaalo noqdaan

Asalkoodii sidii eey ahaan jireen eey kulaabtaan waa taariiq jirto aan la in kiri Karin

Taariiqdeeyda in aan inkiro waxaa karoon in aan qirto. qaladkeeygii aana saxo wixii qaldamay.
Carab intii eey dhex deeda is cuneeysay waxaa xoogeeysanaayay
Uk iyo boortaqiis dadaalkoodaas waxeey usahashay in eey helaan qaarada Ameerika ,
Sunada Rabi waxeey tahay in Dowlad walba eey duqoowdo eeyna dhimato
UK waxeey kusoo koobantay
Jaziiradaas yar. boortaqiis waa qeeyb samay qaarna waxoow dagay
Baraaziil qaarna halkii eey asal deganaan jireen ayeey kusoo koob meen . kuwa manta nool 500 sano magaari doonaan waa iga su`aal?
Hadii eey noqdaan Dowlad duqoowday yaa umaqan HUBKA wax halaago?
Dagaal qoomiyad ama mid Goboleeysi maka bad baadi doonaan mise?
Diin leesku xasuuqo iyo Masiixiyada oo kursiga kusoo laabato Malaga bad-baadi doonaa mise?
Jawaabta waxaan kasugeeynaa Rabi sida oow wax yeelo iyo Taariiqdan qormeeyso.

_____

Jaceylkeyga Shiiqan iyo qadarinta aan u hayo

hadii leeydhihi lahaa kala dooro

4ta imaam iyo Ibnuqalduun.

hadii leey dhihi lahaa kala dooro

Ibnuteymiya iyo Abaaxaamid alGazaali,

dhamaantood waxaan kadooran lahaa

Ibnu-Khalduun waayo Cilmiga oow alifay iyo Kutubada oow

qoray waxa kuqoran meel kale kama heleeysid 80%.

QORAAL DIINEEDKA QALINKA SOMALIDA (Q.D.Q.So)

qaabka aan uqornay waxaan kaga deyanay Ibnu-khalduun lkn ma badna waa 50%.

#Wadaad, iyo Sheeq Hantidooda ma,badato

Shaqada waxeey u-kala lacag badan tahay hab-ba sida eey bulshada ugu baahan tahay

Magaalda waxa loogu isticmaalka badan yahay ayaa ugu gedmi og

,lkn qoladaan maxeey gacanta ku haayaan oo eey suuq geeyaan?

Jawaabta waa ,waxna faro kuma haayaan,wax saakay hadii Suuqa lageeyo gadmayo gactooda kuma jiro.

hoowshooda waa Dhaxal ukala qaad Dad-dhintay Caruurtii eey dhaleen. 2bo guur ku hishiisay isku-mehri, Masaajid ka-aadaan, Xer Cilmi doon ah Shiid dartii Qadadii ugooysay Masaajidka Cilmi kubar, qolo Moowliid qabto maanta la sooqadeey, qaar Aabahood iyo Hooyadood in loo duceeyo

rabaan hakuu wacaano ee horay uraac, Hoowsha Wadaadka Magaalada kaqabto sida badan waa wax eey Bulshada intooda badan eey kamaaranto

dad qaas ah ayaa ubaahan Wadaadka waxa oow haayo ee Cilmi ah .

Sheeqa magaalada iyo kan Masaajidka ka aadaamo, iyo kan Qaadiga maxkamada ka`ah , Dowlada ayaa Lacag siiso ama cidii Magaalada xakunto, Dowlad wax eey kuu qoondeeysay ama Xafiis lagaa soo siiyay sidii ceeyrtii UK iyo Yurub laga qaadanaayay . qofna wax loo xisaabiyay Hanti buuran uma noqoto waa nolol maalmeed.

 # Maqaamka Sheeqa Masaajidka fadhiyo

aqoonta oow leeyahay iyo Cilmiga oowbartay Naftiisa uma quuro in oow hoos geeyo

mid magaalada kunool oo laga heeybeesto ama Hanti oow Rabi siiyay ,

waqti oow meelaha kusoo dawarsado maba haayo waayo hoowlaha oow Umada uhaayo ayaa kabadan ,waa mid ku mashquulsan Cilmigaas Sharafta badan Maal Aduun kuma doonayo ee Aaqiro Jano ku gal ayuu dadka wax ubaraa. Nabiga mar oow arinkaan ka hadlay waxoow yiri "xeendaabka Rususha ruuxii soo galaa

Diinaar iyo Dirham lagama dhaxlo ee Cilmi ayaan katagnaa."waxaan leeyahay,Wadaad nimada kan weel weeyn uwatoow, Iimaankaada Kiyaawe ku dhuuqso, Albaab qaldan ayaad garaacday hadii aad Diinka ku raadisay Lacag.

Weriye

Dadkii oow la noolaa Sheqa ma aqoonin Weriye war bixin soo diro kana soo waramo Magaalada guda heeda ,

Weriyaha waxa oow kahadlay maanta, beri Taariiqda ayeey geleeysaa = waa Taariiq yahan , Taariiq yahan hanti buuran lagama dhaxlo , waa sidii Wadaadka iyo Sheeqa.

#...Magaalo qaan gaartay maxaad ku garataa?

Kuwa Birtatumo, Kuwo dhalada dhalaaliyo ama dubo, kuwo Cadarka sameeyo, kuwo dharka soo saaro, kuwo saacadaha sameeyo, kuwo Caagaga Biyaha laga cabo soo saaro.

magaalo marka eey sii balaarato waa halka aad ka heleeysid Kuug Maqaayad cuno macaan kuusameeyo ,Kabalyeeri uheelan uqidmeeynta Umadiisa Cabitaan, iyo Cuno nadiif ah , waa magaalo eey ku yar yihiin dadka dawarsado , waa magaalo Wadooyinka eey ku dhinac yaaliin Suuliyaal(Xamaam) iyo meelo eey ku nastaan dadka musaafurka ah ,

Magaalo shacabka kiisa baahan Xafiisyo Lacago ceeyr ah looga qeeybiyo ,kuwooda Shaqo la`aanta ah shaqooyin lageeyo, kuwooda buko Dowlad iyo dhaqtar u heelan dar yeel kiisa laga helaayo , Magaalo qaan gaartay waxaan ku garanaa marka aad ka dhex weeydo cunug Ciida ku falaadayo wixii dhalayna eey dayaceen .

magaalada qaangaartay.

marka eey balaarato Magaalda waxaa loo kala tartamaa Cod

wanaaga

Nabiga waatii habeen saqdhexe oow usoo dhuuntay wiil yar oo

magaalada Madiina Quraan si cod macaan ugu aqrinaayay.

Imaam Maalig waa diiday lkn Imaam keena Shaafici ayaa

ogol in Tajwiid lasaaro Quraanka laguna macaan sado,

[aniga marka MP3- CD aan ka dhageeysanaayo Sh: Cali Jabir iyo wiilashii Sh: Cali suufi dhalay dareen gaar ah ayeey igu beeraan codkooda wanaagsan , sidoo kale Subaca eey aqriyaan Reer Warsheeq, iyo Reer Beeydhabo dhaqanka iyo Hidaha Somali hodanka kutahay ayaan ku soo xusuustaa , dadka qaar Culimada Sacuudiga eey maal geliyaan ayaa lacod wanaagsan lkn Dunida Rubac ayeey gaaraan Muslimiinta tiro ahaan Sacuudi wiil ku dhashay kaliya ayaa cod wanaaga ku guuleeysto shekada noocaas ah , ilmaha aan weli qaan gaarin weey ka dhaadhacdaa cadaalada heerkaas gaartay.]

**

#Buug in wax lagu qoro waa hoowl magaalo

wax qorista waa cilimi labarto kan ugu wanaagsan waana waxa

lagu garto ruuxa reermagaalka ah ,dadka ilbaxnimadooda eey

qaangaarka tahay 1000 sano ka hor ayeey wax qorista bilaabeen

,4000 -6000 sano kahor ayaa lagu qiyaasaa, ilbaxnimada wax qorista in eey soo bilaabatay .

Nabi Ibraahim ayaa lasiiyay dhoowr waraaqo sida Quraanka sheegay . Rasuulkii Muuse ahaa iyo Ibraahim kutubadooda wixii ku qornaa Quraanka ayaa soo koobay.

Nabi Nuux Kutub lama siinin waayo dadkaas waxeey ubadnaayeeyn dad aan waxba qorin

Taas waxaa cadeyn u ah marka eey doonayaan in eey caruurtooda kawaaniyaan in eey qaataan diinta oow layimid Rasuulka Nuux ahaa waxeey sameenjireen caruurta ayeey soo kaxeeyn jireen Nuux halka oow fadhiyo ayeey keeni jireen waxeeyna dhihi jireen iska ilaali ninkan , waxa oow sheegayo weligaa haqaadan , taas waxeey kuu cadeeyneeysaa in eeysan laheeyn Iskuulo caruurta lagu bar-baariyo

Lagana soo saaro nooca aad rabtid in oow noqdo cunugaada Gaal madax adag ama mid Muslim ah oo halis ugujiro in oow

Muslimiinta gaaleeysiiyo

Hadba nooca aad dooneeysid Iskuul kuu soo saaro.

Nabi Nuux qoomkiisa

Wax barashadooda waxeey eheeyd (Taq-liidi) sida Libaaxa cunugiisa bootinta iyo Laf-dafida ubaro ayeey caruurtooda wax ubari jireen , gacan kaqabad mid kudhisan beey eheeyd.

Qoraalka waa cilmi Bini aadanka oow uga soocan yahay Xayawaanka kale

Rabi waxoow ku qaas yeelay Bini aadanka .

Quraanka waxoow ka bilowdaa wax aqri = waxaad aqrisaa wixii qornaa hadii eeysan jirin wax qoran oo lagaaga tegay maxaad aqrisaa? Jawaabta waa waxna!

Qoraalka magaalada ayuu ka jiraa lkn Baadiye kama jiro, aad ayuu uyaryahay ruux wax qori karo ama wax aqrin karo in aad ka heshid meelaha Tuulooyinka ah ee hada soo korayo.

Qoraal waxoow kamid yahay wax yaabaha aan aasaasiga u

eheeyn nolosha Bini aadanka , sidaas ayuu ugu soo koobmay magaalooyinka . Magaalo marka eey balaarantahay wax walba ayaa laga helayaa

wax qorista marka laga soo gubdo Iskuulada qaar waxeey ardayga baraan sida farta loo qurxiyo

Carabiga iyo Laatiiniga qaabka loo qoro, oo qurxoon .

Quraanka kariimka ah qaabka loo qoray maanta waxaa alifay sheeq Sacuudiga ku dhashay[, (1) .ruuxa marka oow magaalo ku gaaro sadex jiil ama 5 jiil colaad iyo barakac ka bad baado waxoow bilaabaa in oow sii qurxiyo dhaxalkii awoowa yaashiis wixii labaray in oow sii hormariyo ayuu ku dhaqaaqaa.

[, (1)bal dib unoqo waxna ka aqri sidii eey unoolaayeen Umada aan kuu soo tilmaamay waxaa kuu soo baxayo in eey Geel dhaqato baadiyo kunool ahaan jireen kacdoonkii dheeraa iyo jalaafadii eey u dhigeen Dowladii Cuthmaaniyiinta kadib waa kuwaas Daarta sare dul saaran waloow eeysan usuura gelin in eey Caalamka Islaamka eey wada xakumaan sida oow qorshahooda ahaa.]

 # Somalida iyo wax qorista

Aragti waxaa jirto dheheeyso (Hida-raac) hadii Awoowa yaashaa eey ahaan jireen kuwo Diinta jecel waxaad noqotaa mid hida raaco waalid kii kudhalay oo Diinta ayaad jeclaataa aragtidaas Quraanka waa taageeray ,AALA-CIMRAAN waa qoowska oow kadhashay Nabi Ciise weey is hida raaceen Quraanka hadii aan dhankaas ka fiirino waa taageerayaa hida raaca lkn hadii aad dhan-kale ka eegtid waa diidayaa waatii Nabi Nuux wiil kiisa Gaalka noqday iskana diiday wanaagii oow Aabahiis waday 5ta ugu sareeyso ayuuna kamid ahaa Aabahiis , sidoo kale Nabi Ibraahim waalaga diiday Diinta oow layimid Aabahiis ayaa Deb ku riday , Nabi Muxamad waa waalan yaahay ee yaan laqaadan waxa oow sheegayo waxaa sidaas dhihi jiray ABUU JAHAL oo adeerkiis ahaa . "Waan kudhalay ee isoo raac majirto" Somali ayaa sidaas ku maah maahday.

Somalidii hore ee Xamar iyo Zeylac deganeeyd waxbeey qori jireen waxbeey aqrin jireen lkn wax aan ognahay ma ahan qaabka eey wax uqori jireen magaca eey isticmaali jireen maba eheeyn Somali ee waxaa lagu maga caabi jiray BAR-BAR. erayga Somalida maanta nool waxeey isku fac yihiin Imaam Algazaali 450 ,H. noolaa taas waxaa kuu cadeynayo marka aad baartid abtirsiimaha eey maanta adeegsadaan 20 Awoow ma dhaafsiisna = 1000 sano kama weeyna Somalida maanta

Somalida maanta iyo Buugaagta eey qoreen

Afka Somaliga qoristiisa weli 50 sano ma gaarin. 1970kii ayeey bilaaween in eey Afkooda wax ku qoraan maadaama Somali eey isku dhaqan yihiin Carabta dhanka siyaasada 20 kii sano

Somalida waqooyi iyo koonfur ,bari iyo galbeed qalinkooda waxa oow qoray

Buugaag kabadan 200 buug inta aan tiriyay aniga mar aan

booqday

[Indiana Universtiy Librari] boga eey ku leeyihiin Netka waana halka lagu keeydiyay qoraalo badan

Waloow qaabka loo qoray 1 aragti eey ku saleeysantahay

Dowladii waagaas jirtay qaabka eey wax u aragtay lagu saleeyay , anaga oo ka fogaaneyno siyaasada Somalida maanta iyo shalay ,halkaas buugaag ,Qalin Somali lagu qoray ayaa ku keedsan cidwalba ayaana qortay dhaqaalaha lagu bixiyay waxaa laga soo qaaday Hooyada suuqa Qudaarta ku iibiso canshuur laga soo qaaday. waana dhaxal Somali oo idil ka dhaxeeyo aanan ruuxna si gooni ah u laheeyn.

2000 buug weey kabadan yihiin hadii Somalida waxa eey qoreen 1 meel leeys-kugu geeyo .

onlinka ka dalbo, ama Maktabada aad , AMAZON.COM waxaa lagu iibiyaa Buugaata Somalida noocii ugu danbeeyay.



**

#Qalinka .....HINDIYA

-Cilmi falag ayeey alifeen

-ciyaarta Sha-dhranji ayee soo saareen

-Maxamad Al khawarzimi iyaga ayuu aqoonta kaqaatay

-Heeso sameenta iyo laxan uyeelida iyaga ayaa laga keenay

-Suufi nimada iyagaa keenay iyo sida Nafta loo ed-biyo. Eeraan ayaa ka soo amaahatay Suufi nimada kadibna Masiixiyada kadibna Muslimiinta ayeey usoo gudubtay .

[Nafta waa sida Owr Leeyli bartay iyo mid aan la barin .Ratiga kiisa aanan hayinka eheeyn rarka lama dulsaaro. Suufi nimada waa sheey qurxoon Buuraha Nabiga ayaa galay Qisooyin ayuu Quraanka ka kooban yahay , qushuuc lala ooyana Quraanka

ayeeyba kuqorantahay,naceeybka oo lala dagaalamo qalbiga oo xiqdiga laga tirtiro waa dhaqanka ahlu Janada. is jeceeylka Suufiyada dhexdooda kamuuqdo waa dhaqanka dadka Janada gelayo lagu garto .]

Qalinka ..... Israa`iil

Rabi waxoow amaanay Qudus iyo magaalooyinka u dhow

waana dhul barakeeysan

waa halka ugu badan ee lagu daadiday Dhiig Muslim. ilmo

Nabi Yacquub dhalay ama kuwo kasii farcamay Dhiigaas

haka daato , Muslim Carab kasoo jeedo ama mid Afrika ka

yimid. Nalka aqooneed waa halkii oow Rabi Dunida oo dhan

uga iftiimiyay

Giriiga aqoonta waxeey ka qaateen Nabi Daa`uud .

Ilbax nimada Israa`iil kaalinta eey ka qaadatay waxaa ugu

badan dhanka Diinta .

Nabi Ciise, Nabi Muuse, Daa`uud iyo Nabi Suleymaan, 3

Kutub ayuu Rabi kusoo dejiyay.

Nabi Daa`uud iyo Wiil kiisa ayaa ugu caansan waxeey ku caan baxeen

DHISMAYAAL, CODKA OO LAXAN LASAARO, XUKUN RAAGO, CIIDAN AWOOD LEH, DARUURAHA OO GAADIID LAGA DHIGTAY , KURSI ILBIRIQSI LAGU SOO QAADAY, TAALO SIDA AARGO LOO SAMEEYO.

Quruxda iyo Lacagta

Heeybada waa noocya badan tahay

Ruuxa marka oow noqdo aqoonyahanka ugu cilmiga badan waxaa laga yaabaa in oow

isla weeyni kaqaado waayo waxoow ismoodaa in aqoontiisa eey

Umada kamaarmin

hadii oow yahay Farsamo yaqaanka magaalada ugu aqoonta badan , dhaqtarka ugu sareeyo dhaqtarnimada, leh taqasusu aad ufog , qoraaga qalinka wax ku weeraro ,

shaqsiga marka oow kasoo jeedo reer Wadanka soo xakumay sida Aabahiis oo Waziir ahaa ama madax sare . ama Sh, caalim ah oow dhalay lawada yaqaano , kuwaas oo dhan waxaa kubadan kibirka Rabina majecla kibirka

Qaaruun waxoow ismooday in Cilmiga lasiiyay oow yahay midka ugu sareeyo dunida heer waxoow gaaray Nabi Muse oow ladiriro

aqoonta ruuxii xanbaaro waxeey gaar siisaa in oow yaso Madaxda ugu sareeyso hadii oow yahay Waziirka ama Sarkaal magaalada eey ka amar qaadato .

marka eey dhacdo " ruux aan kuu qabin in aad qiime leedahay iyo mid isla qab weeyn aan ogeeyn in laga awood sareeyo " waxeey sheekadaas ku soo dhamaataa aan kuxero ama aan ku musaafuriyo waayo magaalo mawada joogi karno.Khaalid bin waliid Cumar oo nool ayuu isku deyay in oow amarka kaqaadan waayo Cumar waa cazilay.

Mucaawiye waxoow diiday in Cali bin abii dhaalib oow ka amar qaato , Calina waa diiday in oow ku hoos noolaado xakunka Mucaawiye.

#Heeybada aqooneed Kibir iyo isla weeyni kama marna.

kan aqoontiisa eey tahay waxaan usoo joogay iyo sidaas ruuxii sameeyo balaayadaaas ayaa ku dhaceeyso . aqoonyahanka marka wax yar loo gefo ama wax oow mudnaa loo diido in lasiiyo xiqdi iyo xaasidnimo ayeey dhaxashiisaa waxoowna bilaabaa in aqoontiisa u adeegsado in oow ku burburiyo wixii oow shalay soo dhisay waayo maqaam kii oow mudnaa ayaa loo diiday

Culimada qaar sida Gazaali waa marka eey danta ku kaliftay in oow alifo Kutubka (IXYAA- CULUUM `DIIN) si naftiisa oow u karbaasho Kibirka iyo isla weeynida uga dilo.

[Arar: sheqa waxoow ahaa Dublamaasi waxoowna ka ag dhawaa Dowlada waxoowna jeclaa in wax walba oo amar ah eey Dowla dadka ku amarto in lafuliyo hadii oow badiyay canaanta ku socoto aqoon yahanka. yaan dhib loo arkin , aqoonta aan xanbaarnay hadii eeysan tilmaamin qaldka eey Dowlada ku dhacdo waa kee kan ladoonayo in oow tilmaamo? waziirka xafiiska fadhiyo miyaa ? qalin kaada marka oow ka aamuso in oow tilmaamo dhaliilaha xukuumada waa qalin qadiisa Dowlada eey iibsatay xoog ama xeelad farsameeysan haku iibsato ama Baasa boor cas oo lagu siiyay halagu iibsado.

Ree baadiye Gumeeysi ma jecla Reemagaal ayaa jecel

Xoolahiisa ayuu duurka daaqsin ulajoogaa.

Ceel ayuu Biyo udoontaa Duurka ayuu hurdaa

cid oow ubaahanyahay majiro ,Rabi naxariistisa ayuu kunoolyahay

Askariga reerka waa isaga wixi ladhaco isaga ayaa raadiyo isaga ayaa Boolisnimada xaafada ku qoran Digaaga hadii oow soo weeraro Dabacadeeye(Xoor) isaga ayaa ka dhiciyo

Lacag uma baahna 1 neef ayuu magaalada keensadaa wixi oow ubaahan yahay ayuuna kusoo bedeshaa .waa nin jecel in

oow kunoolaado si xornimo leh.

Reemagaalka

Lacag kama maarmo ,mar oow Aabe kabaryo iyo mar Hooyo ka shaxaado,

Rootiga oow kuquraacdo waxaa usoo sameeyo wiil ka shaqeeyo Foornada

Qudaarta waxaa looga keenaa Afgooye mana yaqaan sida loo beerto

Dowlad kama maarmo waayo hadii la dulmiyo in oow dulmi kujawaabo majecla waxoow jecel yahay in oow helo cadaalad ruuxii dulmiyayna ciqaabtiisa lamarsiiyo

Askari kama maarmo waayo cadaw dibada kasoo duulay ayuu kaga gaashaantaa.

Sarta in aan nabad loogu noolaaheeynin hadii aan lahelin Askari agab dagaal wato ,oo difaaco

taasna waxeey ku timaadaa canshuurta ayuu dhiibaa si marka

Askariga oow dhaawacmo , dhinto,ama dagaalka ku maqan yahay Biil ahaan looga dhigo caruurtiisa

waa nin noloshiisa kudhisantahay iskaashato , magaalada ruux walba wax boow keenaa waxa lagu kala bedesho waa Lacag , Lacagta halka lagu sameeyo waa Magaalada

natiijada waxeey tahay Ree magaalka ma ahan ruux kaligiis meel kunool ee Walaaladiis ayuu dhexda kaga jiraa

,walaaladiis waa Ree magaalka kale ee deriska la ah, kuwa kula nool Magaalada, ama magaalada ku dhegan .

Farsamada Alwaax qorida

Alwaax asalkiisa waa Geed sida badan waxoow kabaxaa wadamada Yurub iyo USA ,Baraaziil,

Somali siyaabo kala duwan ayeey u isticmaashaa

Safiito ayaa laga dhigaa Guriga marka ladhiso ee Laamayeeriga lasaaro , Alwaaxda

waxaa laga sii hoos mariyaa Safiito , qurux dhanka Guryaha weeytahay sidoo kale qaboow ayaa laga helayaa maadaama wadanka kuleeyl oow kajiro.

Carabta waxeey ku magacaawdaa ninka hoowshaas aqoonta u leh

(Najaar)

Somali dadkii hore waxeey isticmaali jireen

Geed Xarar lagu magacaabo waana Geed ka baxo gudaha Wadanka

sida badan Aqalada kasameeysan Laamayeeriga ayaa lagu dhisi jiray, ee aan aheeyn Dabaq ama Sar.

Alwaaxda qalabka laga soo saaro waxaa kamid ah

Armaajo , kuraas,Sariir,Miis, Albaab ,iyo wax yaabo badan oo Guriga looga maar min

dadkii hore sidaas ayeey u isticmaali jireen Doon ayeey ka dhigan jireen .

asalkii Alwaax qorida Nabi Nuux ayaa laga soo gaaray waqtigii danbe waxaa farsamadaas kucaan baxay Giriiga Buugaag ayeey ka diyaarireen , Fuundi nimada iyo Alwaax qorida.

_____

Ilbaxnimada aqooneed waa qori isku dhiib

[arar: ha ila yaabin Awoogeen Somali ayaa dhihi jiray " wiilkaada iyo wiil gaalo garta waa loo simaa "]

Fircoon waxa oow dhaxlay dadkii isaga kaga horeyay Ilbaxnimada

dhinaca maamulka waxoow ka ahaa eber

lkn, farsamo, dhaqaale ,dhismo , waakusareeya

Fircoon waxoow aqriyay in Dunida Biyo lagu maasheeyay

waxoow xaqiiqsaday in eey dhici karto taas .ma aaminsaneeyn Rabi in oow jiro lkn

Taariqda ayaa bartay. sidookale dadkii waagii isaga ka

horeeyay noolaa waxeey ku sheekeeysan jireen in lagaarayo xili dhulka la duqeeynayo , xidig ayaa soo dhici doonto sidaad ayaana wax walba oo aqoon dunida taal ku dhamaaneeysaa , kuwaas fikir kaas aaminsan weey jiraan maanta 2000kii dunida weey is bedelee ayeey noogu shee keeyn jireen heer qaar eey Kaniisad inta eey dhex degeen aaqirkii isgubeen si eey uga bad-baadaan dhibka soo socdo.

Fircoon waxoow bilaabay in oow dhiso AHRAAMTA kuna qoro waxii aqoon Masar dhextiilay waagaas

Biyo hadii dhulka eey ku fatahaadaan sidii Nabi Nuux Doontiisa oo kale in aqoonta eey waarto ayuuna sidaas u yeelay.

Fircoon iyo dhanka maamulka

Caruuta ayuu qalan jiray kaligii in oow taliyo ayuu jeclaa

Masaari cid aan eheeyn in talada laga ilaaliyo, Yahuud in la adoonsado

sidaas ayuu dhaqan kiisa ahaa.

Adoonsi waalooga horeeyay isaga ma keenin Dunida lkn mad-habta oow keenay ee ah kali talis nimada, Maati leeska, Qoomka aan ka dhashay dadka oo dhan ha u taliyeen ,Adoon iyaga haloo ahaado iyo dhaqano aad u fool xun ayaa laga dhaxlay .

YAHUUD marka Rabi Adoonimada ka saaray

1500 sano ayeey hogaanka hayeen wadadii Fircoon ayeey qaadeen

dhaqankiisii ayeey yeesheen kaaga daran gaalo ma eheeyn lkn Muslim Gaal kasii liito ayeey noqdeen Rasuul walba weey dili jireen YAHUUD ayaa dadka ugu fadli badan ayeey qaateen ileen Fircoon ayaa ku dhaqmi jiray fikirkaas fooshaxun ,

Rabi dhulka lama gooynin sidii kuwii gaalada oo kale lkn waxaa lagu saliday Qabyaalad isnaceeyb heer eey kooxo

kooxo noqdeen

marka Bulsho eey ka baxdo in eey Fikir taageerto eeyna kusoo koobanto Qoomkeena ayaa jiro cid kale waxba ma ahan aaqirkii waxaa kadhalanaayo qoomka noo kala qaada tee ayaa sii Nasabsan? ileeyn Qoomnimada waa sidii Qolofkii Basasha oo kale gunta hoose hadii loo dego waxaa loo tagayaa Qoows ka kooban Aabo iyo Hooyo, Qoomiyada halkaas ayeey ku soo kooban taa, ficiltan Aabo 2 reer leh ayeey ku soo dhamaataa, lkn Fikirka waa wax ,aad aaminsantahay ruuxii aamino ayaana dadka kuu xigo

sida Diinta Islaamka iyo Diimihii kasii horeeyay moowduuc dheer oo Kutubo laga alifay waaye aan iska soo koobno warka.

الفصل الأول في حقيقة الرزق و الكسب و شرحهما و أن الكسب هو قيمة الأعمال ا لبشرية
قال الله تعالى:

الرزق فابتغوا عند الله
..

Nabiga ayaa yiri Maalkaada waxaad kuleedahay waxaad cunto iyo waxaad xirato iyo waxaad sadaqo ahaan ubaxsatay oo kaa horeeyo.
lkn Sheeqa waxoow leeyahay hoowsha Maalka oow qabto

intaas waa kabadan tahay

Dawo ayaa lagu iibsadaa, Kutub ayaa lagu gataa, Daar ayaa

lagu dhistaa, Dumar ayaa laga guursadaa, Diyaarad, Gaari, qalab

Koronto ayaa lagu soo iibsadaa.

Xadiiskan waxoow lamid yahay :Ruuxii 5,ta salaad dukado,

Soomo, xajiyo, Jano ayuu galayaa." intaas oo lasameeyo Naar

loogama bad baado , Denbiyo kale hadii oow layimaado waa

loo ciqaabi karaa Rabi waxoow doono sameeye waaye.

qiimaha Lacagta

xooga dadka bilaash laguma cuno

Rabi waa caadil waxoowna qaali kadhigay xooga bini

aadanka

. Rabi waxoow sameeyay Dahab, Dheeman, iyo dhagxaan

Dunida eey qiimeeyso

, Dunida waxa ugu qaalisan waa Nafta Bini aadanka, Xoogiisa ayaa soo labeeyo Hantidiisa ayaa 3aad ah

sharaftiisa ayaa 4aad ah nolol in loo ogolaado ayaa 5aad ah.

Lacagta cida isticmaasho waa dadka cadaalad hadii lawaayo dhanka Lacagta ah waxa dhacaayo Somali hala weeydiiyo.

 # magaalo balaaratay barwaaqo ayaa dhextaal



Rabi arzaaqda isaga ayaa bixiyo Magaalada marka eey balaarato waxaa ku soo badanaayo Warshado , farsamo yaqaano ayeey dhashaa , marka eey duqoowdo waxaa ku yaraado Farsama yaqaanada Bulshadii weey ka hayaantaa oo meel shaqo laga helaayo ayaa laraad sadaa magaaladii sidaas ayeey

ku noqotaa meel lama degaan ah waxeey ku laabataa sidii eey ahaan jirtay waageedii hore, Baadiyo dhoowr qoos degan yahay ayeey noqotaa .dadka qaar waxeey sheegaan in Webiyada eey guryaan hadii dadkii deganaa magaalada eey ka guuraan

waayo Webiga waxa dayac tiro waa dadka 20 kii sano Somali colaada dhex martay Webiyadii weey gureen ,dhoobo ayaa buuxisay taas waxeey sababtay in Webiga oow fataho.dadka waxeey beero ka dhigteen halkii Webiga ku nafisi lahaa ,Biyaha tirada badan oow bar isaga dhimi lahaa .

USA culimada qaar waxeey sheegaan Webiga ugu dheer in oow guray 1500 sano ama 3000 sano kahor , Rabi ayaa og taas lkn weey muuqataa in Webi oow mari jiray hadana wax biyo ah aan lagu arkin.

الفصل الثاني في وجوه المعاش و أصنافه

و مـذ ا هـبـه

Arzaaqda qaar waa mid Rabi bixiyo sida Roobka , Dhulka, Dadka, kuwaas waxaa loo yaqaanaa Rizqi ,

Macaash waxaa loola jeedaa Farsamo in aad ku xamaalatid sida Ganacsi, Ugaarsi,Farsamo yaqaan, Beero tacbid sida Geedo labeero Mirahiisa la iibiyo , Doon lasameeyo Kaluun bada lagala soo baxo, Xoolo laxanaaneeyo ,Caanahooda la iibiyo ama Hilib kooda, ama Dhogortooda sida Idaha, Ganacsiga qeeybahiisa kala duwan .

Culumada Carabta kuwooda ree-magaalnimada ku qaan gaaray sida Sheqeena Ibnu Khalduun waxeey ku soo koobaan 4taan qodob.

"المعاش

إمارة و تجارة و فلاحة و صناعة.

_____.

Beera falashada waa waxa ugu fudud wax cilmi ah oo sidaas u buuran uma baahna, sidaas ayaa loo dhahaa Nabi Aadan ayaa

laga soo gaaray waana shaqadiisii.

farsamo yaqaan waa shaqo magaalo waxeyna ubaahan tahay aqoon macalim ayaa laga bartaa magaalo ayuu joogaa macalimka waayo Baadiye aqoon mataalo Magaalo ayeey taalaa aqoonta sida Mufakir, qoraa, farshaxaniiste, waxaas oo dhan halka eey ku soo hoydaan kuna soo hirtaan waa magaalo ,Canjeero, sida eey ukala koreeyso aa lookala qaadaa, Ood sida eey ukala koreeyso aa loo kala qaadaa, hoowl sida eey ukala muhiim san tahay ayaa loo kala qabtaa, Farsamo waa hoowl magaalo Dumarka ayaa dhankooda ka qaato sida Cunada ugu sareeyso sida loo sameeyo Farsamo ayeey ubaahan tahay Hooyo laga dhaxlay hadii eeysan jirin Gabadha Baadiyaha kasoo haajirtay halka laga baro waa Magaalo , Hooyadaa hadii eeysan ku soo barin sida Sanbuus, macsharo, Kac-kac ,loo sameeyo ,Hooyo kubarto halka eey joogto waa Xamar ama Baraawe ama Boorama halkii Ilbaxnimada eey nooga soo

iftiintay 1200 sano kahor USA +UK lama aqoon waagaas. Farsamada aabahii laga soo gaaray waxaa lagu sheegaa in oow ahaa Nabi Idiris waayo aqoon badan oo sida Magaalo loogu noolaado ayuu Dunida u if tiimiyay .Nabi Aadan Nabigii ku xigay ayuu ahaa , Rabi ayaa uwax yooday qaabka wax loo farsameeyo = Farsamo asalkeedii Rabi dhan kiisa ayeey ka timid waayo waa xigmad ,Rabina waa Xakiim ,Rabi falsan mooyee fal xun laguma yaqaano waxa oow sameeyo waa dhameestiraa ee qabyo ugama tago .Dhulka marka oow sameeyay Buuro ayuu ku adkeeyay sidii Masaamiirtii oo kale Samada Xidigo ayuu ku qurxiyay. Sawir midka ugu quxurda badan Rabi waxa oow sawiray ayaa ugu qurxoon bal arag Balanbaalista Daa`uuska Ubaxa dooga ka dhax baxay bal daawo dhirta marka eey magoosho bal u fiirso Kaluunka bada ku jiro midibyada oow kala leeyahay bal eeg Shinbiraha midib-yada oow kala siiyay baala-shooda qurxoon , Rabi Uunkiisa hadii aan wax kaqorno

Buugaag tiro badan ayeey ubaahan tahay.

Geel jire iyo Farsamo kala dheer

Geela halka oow daaqo waa baadiyaha fog waxaa laga yaabaa bishii 1 mar in oow magaalo yimaado , sida aan sheegnay Farsamo waxaa dhalay fikir ruux mufakir ah waxoow ku nool yahay magaalo , Carabta dhaqankooda waxaa kamid ah in eey kafaanaan Farsamada waayo asal koodii waxeey dhaqan u leeyihiin Geel jirenimada waana sidaas mida keentay in eey magaalo degi waayaan waayo Geela magaalo laguma dhex heeyn karo, Reer Xamarka waa marka eey dhahayaan " Geel dhuuntiisa Ibriiq camal waaye" Diinta Islaamka waxeey ku dhisan tahay Magaalo, Magaalo ayeey ku dhalatay kuna soo barbaartay kuna dhiman doontaa, Carab maadaama eey u badan yihiin Geel dhaqato , Diinta Islaamka Culimadeeda dhamaantood waxeey ahaayeen Ajnabi Carab ma eheeyn , Muslim, Buqaari,Tirmithi, Ibnu maajah, Albaani, Gazaali, Sh,

C/ qadir jeylani, ,dhamaantood Eeraaniyiin ayeey asal koodii kasoo jeedaan waa dhulkii eey Furus xakumi jirtay waana dadkii reer magaalka ahaa

waayo Geel maba joogo dhul kooda .

**

الفصل السادس في أن السعادة و الكسب إنما يحصل غالباً لأهل الخضوع و التملق و أن هذا الخلق من أسباب السعادة

#Farxad iyo barwaaqo Magaalo ayeey dhextaalaa



Shaqo waxeey dhashaa Lacag , marka Hanti oow ruuxa helo waxaa ka yaraado masuuliyadii saarneeyd taas waxeey sii dhashaa in Farxad oow kunoolaado waayo waa jibaad kii saarnaa waa laga qafiifiyay Magaalo ayaa arin kaas laga helaa, Quraanka waxoow tilmaamay Rafaadka raaxo aa ka danbeeyo , waa run Aaqiro waxaa raaswacan degaayo kii Rabi kabaqay sidoo kale waxaa raaxo Aduun gaaro ruuxii shaqeeysto ee

dhidid kiisa cuno cadaalada Rabi oow ugu tala galay in Dadka ku dhaqmaan ayaa sidaas ah Rabi waa caadil ,

dadka waxeey magaalo ku degan yihiin wax wada qabsi = in leesku shaqeeyo

mid hadii oow Dharka soo saaro midka kale waa in oow Rootiga foornada geliyaa, kan kale waa in oow Magalada cadaw ka waardiyeeyo ama oow tuuga magaalada qasaayo oow ka qabto ,Rabi waxoow yiri Samafalka iskugu kaal meeya . Wado Laami ah in aan wada dhisano hadii aanan iskugu kaal meeynin , magaalada waa in laga guuro ruux walba Geel inta oow yeesho sadax subax leey Biyo udoono, Wadaanta Ceelka kutuuro Geelaaga waraabso.

.

Noocyada shaqo iyo Madaahibtooda

.Shaqooyinka qaar waa mid Rabi inooqabto sida Roobka Dalaga

Beeraha , barbaarinta Xoolaha iwm

Bal kawaran hadii Rabi oow dhihi lahaa wadan walba hadii oow doonaayo in oow Roob helo

Hasameesto Tubooyin waa weeyn kuwaasoo kasoo qaado Biyo Daruuraha.

ama oow dhihi lahaa wadan walba oo doonayo in Webi loo sameeyo(loo jeexo) ha keensado

CAGAF-CAGAF(Makiinada webiga lagu qodo) , dadka waayadaan danbe waxaad moodaa in eey halmaameen in Rabi oow awoodiisa ku qoday Webiyadaan waa weeyn sida webiga Niil, ee ugu dheer Dunida bal kawaran qarashka nooga bixi lahaa sameeyntiisa hadii Rabi oowsan sameeyn leheeyn Webiga noocaas ah? fatahaad ayaa dhici leheeyd.

Bal kawaran hadii Biyaha Roobka eey ahaan lahaayeen sidii Biyaha Bada oo kale .Dalaga Beeraha maba soo bixi laheeyn ,hadii eey sidaa dhacdo nolol mataalo Dunida.

Beeraha

-Shini ayaa lagu xanaaneeyaa,

-Muus ayaa lagu beertaa,

-Xoolo ayaa lagu dhaqdaa,

-Geedo waa weeyn ayaa lagu dhex beeraa sida Alwaaxda.

hoowlaha Beer falashada waa waxa ugu fudud ninkii bilaaway waa Nabi Aadan ilaa waagaas Umada weey taqiinay qaabka wax loo beerto.

Farsamoyaqaan.

Fuundi,Makaaniko,Dhaqtar,

Hoowlahaas waa hoowlaha ugu dhibka baran barashadooda Dadka kuwooda reermagaalka ah ayaa hoowshaas ku xeel dheer,waayo Magaalo qaabka loo hor mariyo waxaa garan og kii ku dhex barbaaray

lkn ruux Geel jire ah magaalo ma dhiso, Farsamo yaqaan nimada waxaa laga soo dhaxlay Nabi Idriis aabihii 2aad ee Dunida ,isagana Rabi ayaa baray ee Buug kama oowsan baranin hortiis eey dad kale sii qoreen.

Ganacsiga

Waa hoowl aad u dhib badan waayo waa hoowl ku dhisan qiyaas iyo lacala

Ruuxa alaab doonayo in oow soo iibsado kadibna iska sii iibiyo waa in oow meelobadan wax ka eegaa .

amaa ku qasaartaa! maya faa`iido ayaad ka heleeysaa 1000 su`aal ayuu is weey diiyaa ka hor inta oowsan iibsanin alaabta. Diinta weey baneeysay Ganacsiga waloow oow leeyahay qaab u eg sidii Qamaarka oo kale

**

Maciishada iyo Maalka

Maalkaada waxaad ku leedahay waxaad cuntay oo calaf-calool galay noqday

waxaad marasho kadhigatay oo Korkaada ku-duldhamaaday

‘Maro duugoowday ,

waxaad Sadaqeysatay oo Aaqiro kaaga horeeyo , Hantida marka oow ruuxa leeyahay waxaa lagu ogaadaa in oow sidaas u isticmaali karo hadii oowsan sameeykarin sidaas waa Adoon ama waa shaqaale oo isaga malahan . Maalka isaga ayaa Adoon kaa dhigan karo marka oow kuu diido in Dacas aad ka iibsan kari weeydo , Sadaqo kadhiibi weeydo, Dawo iyo Cuno naftaada uga iibin kari weeydo , heerkaas marka aad gaartid waxaad tahay Adoon laheeste u noqday Maalka Aduun

aaqirkii "waad cuniweeyday waa laguu cunayaa" oo waa lagaa dhaxlayaa .

 # Ar-zaaqda asalkeeda qasnada Rabi ayeey kasoo baxdaa

Roobka waa rizqi lkn Dowladaha dunida oo dhan hadii eey

isku tagaan kuuma diidi karaan mana kusiin karaan Roob .

hadii eey Dunida hormar gaatro eey dhacdo in labacrimiyo Daruuraha

sidaasna Roob lagu helo , ogoow Qarash ayaa ku baxayo bacriminta Somalida waxeey ku maah maahday "Gacan aadan leheeyn Afkaada weey kadaashaa".

sanadkaan hadii eey kusaacidaan Dowlado shisheeye beri ayeey kaa caajisaayaan ,

Rabi waa isaga midka aan Shacabkiisa ka caajisin, caasi iyo baari waa isaga midka Arzaaqo.

Shaqada

Shaqada hadii eey yaraato waxaa kordho baagamuudo waxeey sii dhashaa

Magaaladii oo cidlo noqoto waayo Magaalo waxeey ku dhisantahay shaqo

Guryaha ayaa raqiis noqdo cid degto markii lawaayo iyo cid

dayactirto Birtii ayaa mirirto(daxaleeysato) rinji cid mariso majirto .

Bal ufiirso magaalooyinka waa weeyn ee Bulshada kunool tiro badan tahay sida eey shaqooyinka ugu badan yihiin iyo barwaaqada taal .

Bal ufiirso magaalada aan sifiican u dhismin dadka kunool eey yar yihiin sida eey Arzaaqda ugu yartahay shaqooyinka u-gu liitaan .

#Reemiyi in la eedeeyo ma ahan

Magaalada in nabad lagu joogo amni lahelo waxaa sabab unoqon karo in wax labaro ree miyiga hadii kale waxa dhacayo Somali cashar weey kuqaadan kartaa Taariiqdii madoobeeyd.

Cumar binqadaab ayaa waxaa usoo dacwooday Oday waxoowna yiri waxaa idharbaaxay Wiil keeyga ,

Cumar ayaa Odaygii weydiiyay Wiilkaada maxaa bartay ?

Odaygii ayaa kujawaabay

sida Geela looraaco ayaan baray .Cumar ayaa Odaygii kuyiri iska raalinoqo wiilkaada waxoow kumooday Geelii in aad kamid tahay ,Ushiisa in eey kugu dhacdo adiga ayaa usabab ahaa waayo wax ma aadan barin.

sidaas waxaa lamid ahaa Nabiga ayaa nin Reebaadiya ahaa ceejiyay isaga oo lafara ciyaarayo Nabiga inta oow soo jeestay ayuu ku qoslay xanuunkii loo geestayna waa iska ilooway,Nabiga waa garwaaqsaday waayo Reebaadiyaha Nabiga Diinta ma oowsan gaarsiinin waqtiga oow geliyay Reemagaalka ma oowsan gelin Reemiyiga wax baristooda marka oow uyimid mid reemiyi ah waatii oow Masaajidka ku dhex kaadiyay Nabiga ma oowsan layaabin .

wiilkaada hadii aadan waxbarin in aad eedid ma ahan marka oow qaladkiisa bato.

Imaam Shaafici Fiqhi marka oow ka hadlaayo ruuxa Ree

baadiyaha ah hadii oow Quraanka ku gefo ,Gaal noqon maayo, ama oow Salaada iska diido

Waa labarayaa waana lasugayaa inta oow ka garto waxa Diinta Islaamka ku qoran .

Xisaab labarto dhaqankaada ma bedesho ee ,cilmiga bulsho ladhaqanka, ayaa dhaqankaada bedeli karo.

.....

يد الله مع الجماعة
= Magaalo kuwa degan
اهْبِطُوا مِصْرًا فَإِنَّ لَكُمْ مَا سَأَلْتُمْ
(61 Baqara)
تأبى العصي إذا اجتمعن تكسرا وإذا تفرقت تكسرت آحادا
..
أيتها الأعواد اجتمعي حتى لا تتكسري.

وقال يا بني لا تدخلوا من باب واحد وادخلوا من أبواب متفرقة
(67 Yusuf)
waanada Nabi Yuusuf Aabihiis caruurta oow siiyay hadii aan tawiiliyo waanada waxoow ula jeedaa 1 badeeco oo isku mid ah 1 dariiq hala fariisanina ee wax kala duwan suuqa ku kala iibiya

……

 # Magaalo meel casabiyad taalo ma ahan

Qabiilka asalkiisa waxoow kasoo biloowdaa Baadiye waxoow ku dhintaa Magaalo

Qooska marka oow degan yahay meel Baadiye ah Aabaha reerka aasaasay marka oow caruur badan dhalo mid walba meel gaar ah ayuu degaa kuna aqal galaa lkn mafogaado mana ahan mid ka ag guuro walaaladiis waana sida lagu yaqaano ree miyiga waayo Baadiye guri lakala iibsado majiro dhul qaali noqday ama raqiis noqday majiro waa (Ardu-laahi waasic)

Halka magaalada laga yaabo in aad ubaahatid Qarash eeyna kugu qasabto danta in aad iska iibiso dhulii aad asal ahaan ku dhalatay kuna soo barbaartay,

Marka ree magaalka kaftamaayo waxeey dhahaan Xaaskeeyga ayaan usoo iibiyay Gaari cusub si eey ugu xarakooto hadii beri xaalka xumaado waxaan ubadalayaa Tagsi oo reerka ayaan ugu soo xamaalayaa.

Dhaqanka Reebaadiyaha marka eey bataan oo eey gaaraan

Qabiil waxeey bilaabaan Xin ama nin jecleeysi

Waa dhaqan kooda waana halka eey kasoo bilaabato

casabiyada

bal ufiirso Nabi Aadan labadii oow dhalay.

bal ufiirso waxa lagu dhigay Nabi Yuusuf waayo Eedo ayaa

dhashay (Aayo ,af reer waqooyi)

bal ufiirso xinta iyo isnaceeybka dhextaalo labada Xaas ee leesla

qabo

tusaale kugu filan xulufadii eey sameesteen Xafso iyo

Caa-isho, Quraan ayaa kasoo degay.

bal u fiirso Somali xinta reeraha dhextaal

Waxaas oo dhan waxaa u sabab noqon karo ree Baadiye nimada

Weligaaba deganoow Magaalo ,sinji waa maguuraan waqoow

suulka kaagala

 # Isdhexgalka busho

Isdhexgalka bulshada marka oow bato sida Xamar ka jirto maanta iyo shalay sidii loo noolaa

Shalay, waxaan ula jeedaa dadkii Diinta noo keenay ilbaxnimadana noo horseeday

Qaabka eey maanta unool yihiin shalyna unoolaayeen

Asalka Diinta aan ku abtirsano waa dhaqanka laga soo gaaray

In bulshada eey isdhex gasho lana tirtiro Qurunka qabweyninka ku dhisan ee Qabiilka.

hadii aan la tirtirin waxoow ku laaban doonaa halkii oow asal ahaan kayimid ee Baadiyaha eheeyd

Waana halkaas halka oow kutarmi karo lkn Magaalo Beel kuma taranto ee Magaalada beesha weey ku dhimataa.

Marka qabiilka dhinto waxaad ku garataa waxaa bato waxaan kasoo jeedaa Gobol hebel

Xaafad heblaayo ayaan ku dhashay

Ciyaal Boondheere, ciyaal Waaberi, Ciyaalka Wartanabada iwm ayaad maqleeysaa,

Masar sheqa waa uu kahadlay waxoowna yiri

Masar qabyaalada weey kasii dhamaatay

Goboleeysi ayeey u guureen

Alskandariya, Borta saciid, Oswaan, Qaahira, Giiza

Ayuu sheeganayaa ruuxa marka aad weeydiiso halka oow kayimid

Goorta warbixintaas oow qoray Sheqa waa 500 sano kahor,bal soo baar waxii eey sameeyeen Asxaabta Nabiga

Xudeeyfa waxoow guursaday naag Yahuudiyad ah

Sirta kadanbeeyso magaran ninkii sheegtay in oow yahay ninkii kala yaqiinay Munaafaq iyo muumin.

in oow guursado Yahuudiyad

Isagoo kaga deyanaayo Nabi Muxamad ,S.W.W.C.

Cumar bin qadaab ayaa arinkaas ku canaantay guurka noocaas

ah waana kusax sanaay Cumar arinkaas.

maxaa adiga kuu geeyay kuguna kalifay in aad guursato naag Gaalo? waa sidaas sida aan leenahay..

aniga waa guursan karaa Habar gaalo ah adigana waad guursan kartaa lkn Xudeeyfa iyo ruux lamid ah kama yeelin in oow guursado Habar Gaalo

Weliba ruux waziir ah ama Madax ah.

 # Reemagaalka gaboobay dhaxalkiisa Eey ayaa iska leh

Mar koodii hore waxeey kasoo guureen Baadiye ama Baadiyihii ayaa isku bedeshay meel deegaan ah ,kanasii dalacday oo isku bedeshay meel tuulo ah aaqirkii waxeey noqotay caasimad eey dad badan kusoo hirtaan loona soo shaqa doonto loo soo guuro Reemagaalii waxoow noqonayaa mid aan kala aqoon kan eey isxigaan si oow dhaxal usiiyo

Ama oow uga dhigo mid faqriga kabaxo si oow unoqdo mid

hanti leh

Kaaga darane deriskiisa waa kuwo aan u baah neeyn Hanti

Waayo reer magaal waa dantii yaqaan dad faqiir ah marka hore maba agdeyo

Daliil waxaa noogu filan Dabaqyadaan dadka dhistay waxeey ahaa yeen Waziiro

Kala qabiil ah, kala aragti ah, kala dhaqan ah , lkn waxeey ku midoobeen in eey dhistaan

Daaro dhaa dheer nolol raaxa leh si eey ugu naaloodaan. lkn Reemiyi musiibo eey soo haleeshay ayaa uyimid markaasuu Daaqadihii kala baxay, doqonimooy debkaa ba, magaran dhexdeg guriga ee dayactir ilaa oow kasoo laabanayo kii lahaa ileeyn Agoon xoolahiisa waa laxanaaneeyaa ee

Lama cuno.

Sheq ayaa fatwo aqriyay waxoow yiri Booliqaran qofkii dego Salaadiisa ansax ma ahan

,dhanka kale waxoow baneeyay in ladegi karo Guri ninkii lahaa la ogyahay in oow ku dhistay dhidid oow soo shaqeestay ee Dowlad wax laga soo farsameeyay , lasoo bood-bootiyay, Lasoo dhiitiyay, dhuudhuumashoow maalin cad ladheelay aan lagu dhisin .

Marka eey is ag degaan Reemagaal dhamaantood hantiilayaal ah 100 sano kadib waxeey waayaan wax eey dhaxal siiyaan waayo xiriikii

Dadkii kala dhexeeyay ayaa go`ay

Dadka eey wada shee keestaan waa taajir kan deriska la ah waa taajir

Faqiir maba is yaqaaniin

Gurigooda Eey ayaa joogo ama Mukulaal(Yaa-yuur. Bisad)

Aaqirkii iyada ayaa dhaxasho.

 # DHISMAYAAl , FUUNDI NIMADA

الفصل الخامس و العشرون في صناعة البناء

Dhismooyinka waa hoowl reermagaalka uu yaqaano waana waxa ugu horeeyo ee lagu garto magaalo .

bini aadanka marka oow daraaseeyay noloshiisa sida eey ku wanaagsanaan karto waxaa usoo baxday in lagama maarmaan eey tahay in oow yeesho Aqalo

si oow uga galo marka kuleel yimaado iyo marka qaboow yimaado

Dhismo marka laga hadlayo dadka weey ku kala duwan yihiin qaab dhismeedkooda

qaar waxeey ku hoydaan Mudul, Cariish, Aqal Somali, Sar, Dabaq, Guri -Jiingad ka sameysan, ruux walba inta awoodiisa eey gaarto ayuu dhisaa.

moowduucaan marka lamarayo dadka Madaahiibtooda weey kala gedisan tahay

dadka Reebaadiyaha ah waxeey iskaga hoydaan Aqalo Cows

kasameysan sida kan Aqal Somali eey ugu yeeraan Somalida qaarna Guri maba sameestaan oo waxeey dhex degan yihiin Baco ayeey Roobka kaga onkortaan qaarna Teendho .

qaarna meesha eey hurdo kuqabato ayeey dhinaca dhigaan Sali yar ayuu dhabarka ku sitaa kuwaas waa kuwa kunool dhulka aan laheeyn wax Baraf ah sida Afrika

dadka reermiyiga ah Jahliga dartii caqligooda magarto in eey dhistaan Daar, hadii eey soo bartaan sida loo far sameeyo, ma sameeysan karaan waayo waa dad ree guuraa ah hadba waxeey u hayaamaan halkii Roob loogu sheego

kuwooda Beera leeyda ah marka eey deganaadaan 150 sano 1 meel eeyna ka guuri waayaan waxeey isku bedeshaa Tuulo kadibna waxeey sii noqotaa Magaalo

sidaa daraadeed waxaa lasheegaa in Beeraleeyda lagu tilmaami karo asal ahaan halkii laga keenay Magaalo, waayo Nabi Aadan Caruurtiisa markii oow kadhimanayay 1000 sano isaga oo jiro

waxoow ahaa nin Beeraleey ah reerkiisana 1 meel ayeey wada deganaayeen sida Taariiqda xustay.

maadaama eeysan eheeyn reer guuraa gu` Jiilaal iyo deeyr ,waxeey danta bartay in eey Daaro ka dhistaan halka eey dagan yihiin ee Beeraha banaan kooda ah .

maadaama halka eey degan yihiin eey tahay dhul kuwanaagsan beerashada waxeey qodaan dhulka kadibna waxeey qooyaan dhoobo wax beey ku daraan qamiiriso sida Digada Lo`da , Ariga iwm kadibna waxeey qabadsiiyaan Dab marka oow gubto waxoow isku bedelaa Dhagax casaan ah adag kuna haboon dhismaha ,Banaadir marka lajoogo waxaa lagu maga caabaa Bulukeeti gaduud. aad ayuu ugu yar yahay Muqdisho maadaama aan loo baahneeyn lagana maarmo waayo Xamar waa Deex ama Caro cad . halka laga qodi karo ee laga helayo Ciida dhagaxaas laga sameeyn karo waa Afgooye 30 klm ujirto Xamar.

Hargeysa Dhagax ayeey ubadan yihiin guryaha waayo Dhagxaanta waxeey kasoo jebiyaan Buurta SheeKH iyo meelaha udhow .

marka ruux walba Albaab isku soo oodo dadkii waxeey noqonayaan dad aan is aqoonin magaaladii ayaa sii balaaraneeyso

Beel hadii eey eheeyd meel dagan waxeey noqonayaan in eeysan ka warqabin ruuxa jaarka la ah ama deriskiisa ah beesha miyuu kamid yahay mise waa ruux meel kale kasoo guuray taas waxaa ka dhalato in eey ubaahdaan ruux waardiye kanoqdo magaaladii

waxeey dhistaan ciidamo waxeey sameestaan Xabsi waxeey magacaawdaan Maxkamad iyo ruuxii qaadi kanoqon lahaa

waxeey iska iloobaan Oday dhaqameedkii Geedka garta lahoos fadhiyay

Maxkamad ayeey ku bedeleen Geedkii garta lagu qaadi jiray

.Saligii lagu fadhiisan jiray Kuraas ayaa lagu bedelay

Garta marka ruuxa oow layimaado Geedka hoostiisa waxaa laweeydiin jiray

Afkaada miyaad ka sheeganeeysaa dacwada aad qabtid mise qof ayaad soo wakiilatay oo kuu hadlayo?

booskaas waxaa buuxiyay Garyaqaan ama Loyar ama Muxaami kuu doodi yaqaan .

Dhismooyinka qolo walba qaabka eey jeceshahay ayeey u dhistaan

sida Cunooyinka qaar eey uwada jecelyihiin , qaab gooni ah eey lebiska uga helaan laga yaabee in Mawaciis laga xirto Muqdisho lkn aan laga jecleeyn Sacuudiga,

halka dhaqan eey katahay(Abuu-thabi) iyo Yaman , sidaas oo kale qolo wax laqurxoon ayaa qolo kale eey kudiintaa,

dadka qaar waxeey ka helaan in eey u ekeeyaan Guryaha eey dhisanayaan kuwo duqoobay oo gabow oow ka muuqo lkn

mardhaw ladhisay sidoo kale dadka qaar ayaa jecel in eey dhistaan labo Dabaq . qaar aanan jecleen door 3aad in lasii dul saaro,

qaarna waxeeyba neceb yihiin Guri ladul saaray Guri kale oo waxeey ka helaan (Vilo) nooca eey Somalida u taqaano, waa Guri Dusha Laamayeeri kasaaran yahay Derbigiisana Bulukeeti yahay, dhanka xigto Dibada waa dhagax laga soo jebiyay Kaawo.qaar waxey ka helaan in eey Derbi dhagax ah ku waree jiyaan lkn Gudaha eey ahaato Safiito hakii laga dhigi lahaa Bulukeeti .

qaar waxeey ka helaan Guri Shub ah qeeybtiisa sare lagu daboolay Dhagax adag Derbiga gudaha iyo kan debada xigo yahay Dhagax dhamaantiis kasameeysan dhagxaan iyo Biro ad`adag iyo Shamiito (Sibir) guryaha noocaas ah waa kuwa loo dhisto mustaqbal fog marka oow ruuxa ka fekeraayo 3 ama 4 jiil in eey ka dhaxlaan marka oow doonayo.



dhaqanka noocaas ah waxaa leh Dowlada marka eey ka fekereeyso 5 ama 6 jiil in eey hoowl uqabato waxeey u dhistaa xarumo Dowlad oo Dhagax adag kasameeysan Garoomo waa weeyn eey ku hoyan karaan marka dhul-gariir ama Daadad oow

wadanka kadhaco ama musiibo dhanka Rabi katimid,

Wadooyin waa weeyn ayeey Laami adag u saartaa , sida Aabaha Rabi hantida siiyay oow uga fekero jiilasha soo socdo ee ka farcami doono isaga sidii eey nolol wanaagsan eey ugu noolaan laheeyn oow uga fekero .

dadka qaar hoowl qabad kooda waa kabad-badis qaar ayaa jecel in eey dhisaan

 daaro aad u dhaadheer leh meel Gawaarida ladhigto , Baraagtii dabaasha ,

meel Jirdhis meel Gawaarida lagu xareesto Beero loo daawasha tago dadka nuucaas ah waa nolosha eey ku nool yihiin Bororada iyo kuwa ka agdhaw .

#Biyaha

Reer walba oo meel dagan waxaan looga maarmin in oow yeesho meel oow Biyo kacabo dadkii hore majirin Tubo Biyo

oo Guriga kujirto ama Biyo Watar ah oo caagad laga cabo ,
Biyaha Baraag ayaa lagu keydsadaa Guriga lagu dhax
sameeyay ,Dhagax kasameysan , Baadiyaha waxaa lagu
keeydiyaa Aashuun ama mid kasii weeyn waana mid qaadi
karto 5 Aashuun oo Biyo ah iyo kabadan
kaas waxaa bedelay Fuusto Dhagax laga sameeyay aanan
jabeeynin qaadi karto 1 Fuusto oo Biyo ah .
waagii hore 500 sano kahor Tubo Biyo laga cabo majirin lkn
Masar waxeey isticmaali jireen suran-biyamareen ah
(Far-Biyaha maraan) lagana soo jeexay Webiga NIL xaafad
walba Biyo halkaas ayeey kacabi jireen
Markii labilaabay in Tubo xaafada lageliyo Shaficiyada iyo
Abuu xaniifa ayaa isku qabsaday waa xaaraan iyo weey banana
tahay.
Xanafi ayaa baneeyay biyahaTubada in la isticmaalo in eey
xalaal tahay

(Xanafiya) ayaana lagu magacaabaa Tubada Biyaha marka lajoogo Dalka Masar ,maadaama fatwadiisa lagu baneestay in Tubada Biyo laga isticmaalo .

 # Jaangooynta qiima sicirka lakala siisto badeecada

Sheeqa waa uu diiday in Dowlada eey soo fara geliso sicirka suuqa wax looga kala iibsado

hadii Dowlada eey soo fara geliso suuqa waxaa kadhalan karo.

- in Ganacsatada eey kacaajisaan Ganacsiga waayo wax faa iido ah kama helayaan oo xornimada ayaa laga qaaday

wixii faa`iido ugu jirto ayeey dadka ka ganacsadaan .

-farsamo yaqaanka waa iska deeynayaa in oow wax soo saaro waayo qalabka oow soo saaro qiimaha oow doono kuma iibinkaro.

-Ganacsatada alaab dibada kama keenayaan

waayo xor uma ahan suuqa .

Natiijada kadhalan karto waxeey tahay in magaalada eey

indhaha isku qabsato dhaq-dhaqaaqii ganacsiga oow istaago

taas waxaa ka dhalandoonto in magaaladii kobciweeydo

Xaafado cusub eey dhismi waayaan taas waxaa ka dhalankarto Shaqo la`aan.

Dowladana canshuur ma heleeyso waayo bulsho faqiir ah canshuur kuma waa jibto faqriga waxaa ka dhalan karo anshax dari.

wax yaabo eey diinta reebtay in la sahashado.

_____

#Doowlada oo ganacsiga ku soo biirto dadweeynaha waa dhibkooda.

Dowladwalba markeedii hore qarashka ku baxo waa yaryahay lkn hadii eey xakunka ku raagto in mudo ah eey xafiiska fadhido tamashlo ayeey udhaqaaqaan .

Gaari qaali ah , Guri aad u weeyn , Diyaarad lasoo kireesto tamashlo dunida lagu maro, Doon laguraaxeesto , maalmo ciid

fasaxeed aan loo baahneeyn oo wadanka loo sameeyo maalmo dhan shaqada laga fadhiisto waxaas oo dhan waa wax yaabaha eey ku dhaqmaan Dowlada maanta dunida kajiro.

qarashkii lagu tamashleeyn lahaa hadii eey weeydo Dowlada waxeey dul dhigtaa shacabka canshuur dheeri ah, raashiinka ayeey canshuurta ku kordhisaa

ruuxa doonayo in oow warshad yagleelo canshuur xad dhaaf ah ayaa lagu soo rogaa.

markabka alaabta sido, Konteenar walba waa la canshuuraa , shidaalka fuustada $30 hadii looga soo raro SACUUDIGA $20 oo can shuur ah ayaa ladul dhigaa waxaa kuu sii dheer qarashkii xamaalka iyo markabka lasoo saaray

Ganacsatada waxeey qaali ka dhigaan qiimaha alaabta eey soo dejiyeen waayo canshuurtii ayaa lagu kordhiyay .

ugu danbeeyn Dowlada waxeey doorbidaa in canshuurta dadka ka dhaafto taas bedelkeeda

Dowlada ayaa wax walba wadanka soo gelineeyso

Warshadaha iyada ayaa gacanta ku qabaneeyso beeraha iyada ayaa la waree geeyso .

Digsi, dhegle, fiijaan, jalmad, bakeeri , dhar ,wax walba oo ganacsi ah iyada ayaa la waree geeyso .

Dadkii waxeey noqonayaan Adoon , waxeey shaqaale u noqonayaan Dowlada

Waayo wax walba iyada ayaa gacanta ku heeyso .

Cumar bin qadaab waa diiday in Amiirka oow ganacsade noqdo

Cumar hadii aan jecelnahay waa in aan kaga deyanaa fiqhiga -oow ku dhaqmi jiray .

Cumar waa diiday in Suuqa lagu dhex iibiyo alaab raqiis ah waxaan kaga qiyaas qaadan karnaa in la joojiyo NGO waana in lagu karbaashaa fiqhiga Cumar

Waa in la diidaa Galeeyda raqiista ah ee Markabka lagu keeno marka eey Beeraha noo soo go`aan

Si xoogeena looga dhigo tacab shiidleh.

Nabiga waxoow yiri ruuxa Muslimka ah yuusan yeelan 2 Faras ama wax kabadan hadii oowsan ganacsade eheeyn ama diinta oowsan ku difaaceeynin.

Xadiiskaas Dowlada waa in lagu karbaashaa waana in eey joojiyaan Baabuurta qaaliga ah eey Waziirada lasoo dagayaan . shidaalka maalaa yacniga loogu tamashleeynayo si shacabka canshuurta loogu kordhiyo.

shacabkana waa in eey ka waan toobaan yeelashada Guryo waa weeyn aan kiro loogu jirin aanan cidna deganeeyn lkn marka xagaa lagaaro loo dalxiis tago inta kalana eeysan cidna ku nooleeyn. Ogoow waa Lacag meel lagu keeydiyay waxeeyna lamid yihiin Dahabka iyo Dheemanka oo meel lagu keeydiyo , lacagta Bangiga taal ayaaba karoon waayo shacabka ayaa loogu shaqeeyaa taas lkn Gurigaan baas cidna madegana waana lacag faan meel looqotomiyay.

_____

.#.....laba aragti oo iska soo horjeedo kuna saabsan ganacsiga xorta ah

hadii Wadanka lasoo geliyo badeeco kalagedisan oo laga keenay wadamo kale qiimaha lagu soo iibiyay oowyahay midjaban waxeey faa`iido ugu jirtaa shacabka waayo shacabka waxeey helayaan alaab raqiis ah sidoo kale shaqooyin ayaa halkaas ka abuurmayo nolosha waxeey noqoneeysaa mid jaban faqiir iyo taajir sidaas dan ayaa ugu jirto. shaqsiga marka oow helo nolol raqiis ah waxoow iska bixin karaa canshuurta Dowlada kadooneeyso sidoo kale Bulshada nolol jaban ayeey baraare kugaartaa guurka ayaa bato bulshada weey tarantaa marka nolosha raqiis tahay.

hadii bulshada eey baraare kunoolaato weligeed waxaa kadhalankaro in raaxeeysi eey galaan ,nacaan in eey dagaalamaan hadii lasoo hujuumo waayo dad dagaal uheelan

ma ahan mana jecla in oow kadhinto xaaskiisa oow jecelyahay, caruurtiisa qooska balaaran ee farxada kulanool wadanka quruxda-badan ee wax walba eey dhexyaaliin

ganacsiga ukala socdo iyo dadka tartanka oow kala dhexeeyo Dahabka iyo Dheemanka uduugan nina madoonayo in oow ka geeriyoodo daaraha dheer ee oow duldagan yahay madoonayo in dhaqso oow kadhinto.

-Lacagta , Dahabka ,iyo Dheemanka aan heeysano waxaan kusoo bedelanaa Badeeco wadankale lagu soo farsameeyay raqiis ayaan kusoo qaadanaa qaali ayaan kasiinaa dadka wadanka gudihiisa kunool natiijada sheekada waxeeytahay dagaal joogto ah.

ganacsi iyo gacmo isdhaafsi ayaa ka wanaagsan .

Waxsoo saarka dheeriga ah maciishada ayuu raqiis ka dhigaa

hadii ruux walba oo Beera leey ah oow tacbo quudkii oow cuni lahaa 1 sano

Waxa kasoo haro ee dheeriga ah oow suuqa keeno taas waxaa ka dhalan karto in maciishada magaaladaas eey raqiis noqoto , waa marka bulshadaas eey kabad baaday musiibo Rabi keenay sida colaad ama abaar ka dhalatay Roob la `aan.

_____

Noolaha Noloshooda weey isku tiirsantahay

Nina kaligii ma noolaan karo bal ufiirso waxa shaqo ee laga qabtay

Quraacda aan subixii ku quraacano.

tusaale usoo qaadano

Galeeyda nin ayaa beeray

biyaha Webiga nin ayaa ka shaqeeyay oo wadadii Biyaha mari lahaayeen

Baldoos ayaa lagu soo dhanbalay

Beerta makiinad ayaa lagu falay





Shidaal ayaa dibada laga soo dhoo fiyay oo inta lacag lasoo siiyay

Ayaa makiinada Beerta faleeyso eey ku shaqeeysay

Marka Galeeydii baxday dad ayaa ka shaqeeyay qaarna waxeey ka ilaaliyeen

Shinbiraha qaarkale qobka ayeey ka fiiqeen, Jawaano ayaa

lagu soo shubay

Suuqa dad ayaa ku iibiyo

Suuqa marka laga soo iibiyay waxaa lageeyay Makiinada Cajiinka oo qarash ayaa lagu bixiyay sidii looga dhigi lahaa cajiin, laga dhigo Canjeero lagu quraacdo

Marka cajiinka lasoo sameeyay kadib dhuxul ayaa lasoo iibiyay

Dhuxushii dad ayaa Geedka kasoo jaray dhuxushiina soo sameeyay

Daqiiqda Burka cad waxaa laga keenay Ruushaka iyo Yurub waayo Somali kama baxo Qamadi waqtigaan lajoogo

hoowsha laga soo qabtay hagaajintiisa waxeey lamid tahay tii Galeeyda,

Intaas oo gacan ayeey soo martaa si aan u helno quraac aan ku quraacano 1 maalin .



Hadii waxaas oo shaqo aan lasoo qaban Quraac majirto saakay.

Qoomkii Nabi Muuse ma nihin oo MANA & SALWA Samada looga soo daadin jiray.

Quraacda aan ku quraacano hadii aan tusaale kasoo qaadanay

Bal ufiirso waxa shaqo ee laga qabto sameeynta dharka, sameeynta Kobaha, soo saarida Hilibka,

Sameeynta Baabuurta .

Waxaas oo dhan Quraanka waa soo koobay suurada

Ma-ida waxaa ku qoran

"iskugu kaal meeya wanaaga iyo sama falka "

Sheekada noocaan ah waxeey nabareeysaa in aan nahay hoowl wadaag lkn aanan eheeyn hanti wadaag . wax is dhaafsi ayaa bini aadanka ka dhexeeyo ruux walba xoogiisa ayuu ku shaqeeyaa kadibna suuqa ayuu keenaa si wax loogu bedelo Somalida waxeey tiri [Budo qabe iyo Biyo qabe weey isku baahan yihiin]

Dowlada goormee ayeey ganacsi ku soo biiri kartaa?

Marka bulshada eey faqiirtahay Lacag badan eeysan heeysanin si mashaariic waa weeyn eey Wadanka uga hir geliyaan

Waxaa wanaagsan in Dowlada gacan weeyn ka geeysato sidii loo yag leeli lahaa kaaba yaasha dhaqaalaha

Sida warshado waa weeyn oo 10,000 oo shaqaale iyo kabadan

shaqo laga siin karo .

Mashruuc aad u baaxad weeyn marka oow yahay waxaa qarashkaas heli karo Dowlada oo kaliya

Lacag eey soo daabacday haku fuliso ama keeyd meel u yiilay haku hoowl geliso

Ama Dowlado saaxiib ah haloo kaashado

Sida mashruucii Warashadii Sonkorta ee Mareereey

SACUUDIGA & IMAARAADKA ayaa iska kaashaday mashruucaas si Somalida loogu sameeyo

Warshad u soo saarto Sonkrta ,si qarashkii badnaa ee Sonkorta dibada laga soo dhoofiyo loo baajiyo .(1)

Sheeqa waxoow leeyahay mashruuca hadii oow baaxad ween yahay Dowlada haka qeeyb qaadato

waayo iyada ayaa heeyso Lacag adag oo mashaariic horumarineed lagu fulin karo.

_____

(.(1)Dalalka aan weligood ka daalin in Shacabka Somaliyeed hormar gaarsiiyaan ayeey koow ka yihiin 2 badaas wadan .cusnuri cilmaani ah Baasaboor cas laga siiyay galdeedka ayaa Carab caayitaankeeda caadeestay. laga soo bilaabo.1991..2015. xili waxaa nasoo martay Imaaraadka mooyee meel kale aan laga ogoleeyn Baasaboorka Somaliga ,Ganasatada Somaliyeed & qofkii dawo ubaahan Dubay ayuu udoonan jiray wax walba oow ubaahdo.)

 # Sixirka waa xaaraan barashadiisa iyo isticmaal kiisa

Sidaa darteed Islaamka Buugaag kama alifin moow duucaas

qaabka oow u shaqeeyo waayo waa xaaraan

in bulshada loo soo gudbiyo cilmiga nuucaas ah .

Sheeqa Kutubkiisa moowduuc dheer ayuu kaga hadlay

lkn waxoow leeyahay maxaa keenay in Sixir la isticmaalo?

Isaga oo ka jawaabayo waxoow yiri.

Sixir waxaa isticmaalo dadka naftooda liidato kuwa aan

naftooda ku kal sooneeyn

Waxeey falkaas ugu dhaqaaqaan aad Lacag ku heshid ama

Bini aadan aad ku wax yeeleeysid sida Naag ninkeeda la

nacsiiyo ama Nin naagtiisa laga furto

ama ruux hantidiisa Sixir lagu qaato

ama Madaxda si looga ag dhawaado sheekada Sixirka waxeey iskugu soo biya shubataa

Lacag hel ama mansab mid- haayo ka ag dhawaaw si luf-luf aad uga heshid.

Somalida iyo Sixirka

Waqooyi lagama yaqaano Sixir lkn koonfur ayaa laga yaqaanaa

Sixir iyo Faalka dhulka lagu dhigo ama Xidigaha lafiiriyo

Qaar waxaa la iisheegay Yaxaaska wax ku aqriyo Yaxaaskii ayaa rabaayad noqonaayo.

Sixir cadaw kugu soo duulay kaama celiyo ,lkn miskiin deris kula ah ayaa lagula dagaalamaa waana ducufnimada lagu yaqaano Saaxirka Gaal sida Fircoon ama munaafaq ayaa adeegsado sixir. Somaliya wax sixir la dhaho kama jiro maanta

ee sun ayeey dadka siiyaan dadkana sixir ayeey moodaan.

Culumada Islaamka iyo waxa Sixirka eey ka aaminsan yihiin Xadiis waxaa jiro dha hayo Nabiga ayaa la sixray .

Culimo badan ayaa diidan Xadiiskaas qaar waxeey gaar siiyaan ruuxii laga maqlo Nabiga ayaa lasixray waaba Gaalnimo ama faasiqnimo ayeey ku tilmaamaan

Waxeeyna udaliishadaan Quraanka waayo aayada Quraan waxeey tilmaantay in Nabiga macsuum yahay xumaan oo dhan laga dhoowray

in ladilo ayaa laga dhoowray in uu waasho ayaa laga dhoowray sixir waa ka fogyahay mana la sixri karo ayeey sheegeen.

Culimada kale waxeey daliishadaan Xadiiska waxeeyna leeyihiin Sixirka waa sida

Xanuunka caadiga oo kale Nabiga madaxa waa xanuuni karaa caloosha waa laga qaban karaa

Sixirna waa lamid cudur waaye wax-yiga kusoo degayay

waxba uma dhimin caqligiisana ma bedelmin .waa dood dheer oo taagan arinkaas in leeska daayo ayaa fiican.

_____

Gabaygii DAYAX(QAASIM)

Axmad ismaaciil Diiriye

1964 tii ayuu Gabay tiriyay

[*Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kiigalaye, dusha midabka*

Somaali baad dugulka moodaaye , misna laguma diirsadee

Dayaxaa lakala boobayaa , ladhaaf diilinkii Waaq .

Dibbaa laxaha loo eegayaa sacana waa dhaafe.

Daab gudimo weli sooma jarin wiilashaan diraye.

Daruuraa la weeraray nin ogi dan uga faallooye.

Dabaylaha ragbaa kala yaqaan dowga loomaro e.

Madorraato raadknaa dhigaan dib ugu soolaabtay.

Waxba arartu yeey ila durkine waxan kusoo duubay

Maruun bay daruur caafimaad dooxa soo rogiye.]

Waa gabay dheer uu Abwaanka tiriyay aan iska soo gaabino.

Somalidii hore waxeey yaqiineen ,

Sac, Geel, waxaro, Awrka Cirka , oo eey ula jeedaan Xidigaha,

Samada inta eey fiiriyaan ayeey Faal dhigi jireen.

_____

Oday Dayax qaasim marka oow Gabaygan tirinaayay

Dadka qaar waxeey sheegaan waxoow dacwo ka ahaa

Canshuur xad dhaaf ah oo suuqa lagu soo rogay

waxoowna leeyahay Gaalkii Ingiriiska ahaa hadii aan raacdeeyay

kuwii aan udoortay in eey Wadanka maamulaan dhaqankii Gaalka oo kale ayeey la yimaadeen

oo canshuurtii ayeey dadka ku kordhiyeen.

_____

waxaan halkaas kaga bexeeynaa Kutubkii [مقدمة ابن خلدون]

oo aan kasoo qaadanay nuxurka sheekada oow meesha kuqoray

iyo wixii naga quseeyo zamankan aan noolnahay ee Dayaxa lakala boobayo sida Abwaanka noosheegayo . Ibnu Khalduun Kutubkiisa sinaba uma dhamaado lkn hada halkaas ayaan ku hakinay .

Imaamka Maankiisa magaalo nuucee ah ayaa ka dhex guuxaday ?Magaalo nuucee ah ayuu jeclaa in eey Muslimiinta hantiyaan?

Qaloocinta Qalinka hadii aan kadeeyno ,in badan ayaan uqornay Carabta hadal Qalafsan qalindaarna ka muuqdo,

Quruxda Carbeed hadii aan Qalin ku muujino , tusaale kugu filan Magaalooyinka hoos kaaga muuqdo.

(Daawo Sawirada Dubay+Khaliijka sida loo dhisay)

<<<<<<<<DHAMAAD>>>>>>>>>

#Miizaanka 4 kafad leh



Diinta waxeey ubaahan tahay Shacab eey Miizaan unoqoto
Shacabka waxoow ubaahan yahay in oow leeyahay Hanti Umada ka dhaxeeyso. Sidoo kale waxaa lagama maar maan ah in la helo hanti dad gaar ah eey leeyihiin.
4 taas qodob mid kamid ah hadii latuuto Miizaanka dhan ayuu uciirayaa oo wax baa naaqis ah.

Doowlada iyo waxa lagudboon

Canshuur ayeey dadka kaqaadaa lkn canshuurta laqaado maanta

Diinta Islaamka meel eey kasoo gasho majirto. Islaamka waxa oow yaqaano waa Zako wax kale oo waajib ah oo ruuxa lagu leeyahay majiro .

Canshuur waa Fatwo uu wadaadkeenay xoogna lagu hirgeliyay duruufteeda ayeeyna leedahay

Canshuur halaqaado ceeb ma ahan lkn xagee lagu bixiyay ayeey mudan tahay in lees weeydiiyo?!

-Caafimaadka

-Waxbarashada

-Difaaca dalka

Intaas oo kaliya in lagu bixiyo waa qalad

Waxaa lagama maar maan ah in lagu daro

Guriyeeynta .

waa in Shacabka oow helaa Guryo raqiis ah eey iibsan karaan

Kiro eey ku degi karaan qurxoon aanan eheeyn kuwo u eg

Aqalada Doofaarada eey ku hoydaan.

Gabadha iyo wiilka marka eey gaaraan 18 jiro waa in eey heli karaan guryo eey degi karaan

Bilaash ah ama raqiis ah .hadii sidaas lawaayo waxaa dhacayo in eey badato guur la `aanta halkaasna eey ka dhalato Zino iyo waxyaabo eeysan umada horay u aqoon jirin.

Dadka qaar arinkaas weey diidan yihiin waayo hadii lahelo Guryo raqiis ah waxaa kordhayo Guurka Caruurta dhalaneeyso ayaa badaneeyso iyo wax yaabo kale ayeey sheegayaan .

lkn Somali in eey badato waa mid loo baahan yahay ee looma baahna in Shacabka layareeyo .

Ruuxa shaqeeyo canshuurta laga jaro iyo kuwa Ganacsiga u furan yahay waa in lagu dhiso Guryo lagana kireeyo shacabka qiimo raqiis ah

Waayo markii hore isaga ayaa canshuur ahaan looga jaray .



Baabuur (Gaari) Laan garuuzar ah oo 6bustin kuxiran tahay 1 kii saac hadii oow socdo 20 Litar shidaal ah cunaayo inta lagu socdo yaanan la dhihin Shacabka canshuurta halagu kordhiyo.

#Dagaalka Culimada & Ganacsatada

Dagaalka Culimada Dinta & Ganacsatada



Taariiq dheer ayaa ka dhaxeeyso waxaan xusuusanaa in Nabi Muuse markii oow ka adkaaday Fircoon in la isku deyay in la afduubo Shacabka Israa`iil laguna gumeeysto Hanti Qaaruun waxoow soo adeegsaday Dumar jirkooda iibiyo si eey been abuur ugu sameeyaan

Una dhahaan Nabi Muuse ayaa Zineestay oo Garac dhalay

Natiijada ka dhalatay waxeey noqotay in Qaaruun iyo hantidiisa dhulka lala jaro .

(Dunidan aan ku nool nahay Culimo badan ayaa jiraan oo denbiyo eesan gelin qoorta loo geliyay una xiran qaarkalana loo dilay, qaarna waxa ladoono laga sameestay qaarkalana Daroogo qasab lagu baray

lagana adeejiyay Dumarkii la adeegsanjiray si dabin loogu rido . lkn ruuxa inta oow ka carar isleeyahay ceeb aduun in oow ku dhaco Ciqaabta Rabi ayaa kadaran .Sh. Turkiga kuxiran.)

Nabi Muxamad & Dagaalkii lala galay

Nabiga Ganacsato ayuu ahaa lkn Cunaqabateen ayaa lasaaray ardaydiisii waxaa lala wareegay hantidoodii qaarna waa ladilay qaarkale waxaa lagu qasbay in eey kalaabtaan Diinta .

taas waxeey kaliftay in eey isaga cararaan Maka eeyna degaan Madiina .

Guryahoodii waalaga soo saaray waxa kasoo saaray waa Ganacsato iyo Madax isbaheeysatay.

Ardadii Nabiga waxeey arkeen ragii Maka kasoo ceersaday oo si xor ah ugu kala socdaalaayo Shaam iyo Maka halkaas waxaa ka dilaacay dagaalkii ugu horeeyay guushana cida eey raacday waa la ogaa.

Abuu Sufyaan iyo Abuu jahal ayaa horkacayay oo Maka

katalinayeen waagaas .

Maxaa laga doonayaa Ganacsatda?

Ganacsatada waa in eeysan afduubin Shacabka sidoo kale xaq ayaa jiro laga rabo in eey qasab ku bixiyaan waana Zako

Hadii intaas laga helo waxeey kanabad gelayaan Culimada in eey wax kasheegaan Ganacsatada

Sidoo kale Rabi in oow ciqaabo ayeey ka bad baadayaan.

Musiibo waa maalintii sadax Shacabka u- hishiiyaan!

-Wadaad ama Culimo

-Madax

-Ganacsato

hadii eey 3dex daas eey ku hishiiyaan in Shacabka lagu noqdo

Dhiigmiirato

Sida Dagaal aan dhamaaheeynin iyadoo laraadinaayo ruuxii Kursiga ku fariisan lahaa.

(dagaal siyaasi hurinaayo Sheeqna usacbinaayo shacabka lagu duldagaalamaayo hantidooda lagu ciyaaraayo guryo iyo maalkooda

madfac lala dhacaayo)

Culimadii larabay in eey Xaqooda usoo dhiciso Shacabka oo $100 kii lasiiyo Fatwada eey kasoo horeeyso wax walba oo loo soo meeriyo waa sax kujawaabo.

Ganacsatada oo dhiigmiirato kunoqoto Shacabka halkii eey ku fekeri lahaayeen sidii Shacabka

baahidooda loo haqab tiri lahaa.

Dagaalka Culimada Diinta & kuwa Seyniska

Culimada Diinta weligood kama hor imaanin Culimada

Aduunka tusaale waxaa nagu filan

Nabi Suleynaan waxoow lashaqeeyay Culimo Jini iyo Insi isugu jirto awooda eey lahaayeen eey kamid eheeyd in

Carshi dhan 1 daqiiqo lagu keeno. Sheeydaan awoodiisa eey gaar-siisaneeyd in oow Xidigaha tago sidoo kalana

Dhanka dhismaha kahorumarsan.

Thulqarneeyn waxoow ahaa ruux Muslim ah lkn aanan Nabi eheeyn waxoow kuwareegay Dunida oo dhan Derbiga oow dhulka hoostiisa ka dhisay ilaa maanta cid sheegi karto halka oow ku yaalo lama hayo .

Culimada Seyniska iyo Rasuulada Rabi soodiray

Rasuulkii Ciise ahaa C.S.W. waxeey isku waqti ahaa yeen Culumadii Giriiga sidaas oo eeytahay

Kutubkiisa Injiil marna laguma xusin Culamada Giriiga magacyadooda.

Sidoo kale Ciise waxaa ka horeeyay ninkii ladhihi jiray ISKANDAR ee dhisay magaalda AL –Iskandariya lagu magacaabo ee kutaal xuduuda Masar iyo Liibya .

Nabi Muxamad Quraan ayuu lasoo degay kumana xusin ilbaxnimada Giriiga

Waxa ugu badan ee looga sheekeeyay Quraanka waa Jabkii Fircoon iyo Israa`iil Quraanka 70% ayaa looga hadlay

Taariiqda Israa`iil.

Culimada Seyniska

Kuwa maanta nool ee Gaalada ah marka eey kahadlaayaan

Taariiq ama aqoon

Marna masoo hadal qaadaan Nabi ama Rasuul

Xitaa Nabi Nuux oo 1000 sano noolaa weey xaqiraan.

Aqoontii Nabi Suleeymaan lasiiyay weey xaqiraan

Waxa eey buun-buuniyaan waa Giriiga iyo Fircoon

waxeey qariyaan in Nabi Ciise Diintiisa , Giriiga oo ugu aqoon

badnaa waagaas in eey Diinta Masiixiyada lagaar siiyay Qoray

& Seef iyaga oo aanan lala dhicin

Weliba dhulka eey katalinayeen eey eheeyd laga soo bilaalo

ROMA ilaa laga soo gaaro MADA-QASKAR .Jaziirada Somali

bari kaga aadan.

[fiiro gaar ah: waxaa muhiim ah in lagu baraarugo in Diinta Nabi Ciise in eey Dunida tiilay iyadoo sax ah mudo 300 sano lagu qiyaaso ama 400 sano waxaa daliil u ah Asxaabul kahfi waxeey ahaa yeen Masiixiyiin

Diintoodana sax ayeey eheeyd. 200 sano ayeey ka horeeyeen Nabi Muxamad.]

Gaalada reer galbeedka ah iyo reer bariga ubadan indhayarta Fircoonka eey kashee keeyaan waxaa ka adkaaday Nabi Muuse oona dartiis loo halaagay .

nidaamka taariiqda loo qoro waxaa kamid ah in aad sheegtid Dowladii jabtay iyo ruuxii jebiyay .

Marka aad wax naqdineeyso waa in aad ka shee keeysaa ruuxa aad naqdiyeeso waxa oow aamin san yahay kadibna aad naqdidaa .

Culimada Dhaqalaha iyo Xuquda dadka

Xuquuq Al insaan ayaan maqalnaa beryahaan danbe

lkn ma ogtahay in ruuxii ugu horeeyay ee Reer Galbeed ah ee dejiyay Cilmiga Dhaqaalaha in oow aamin sanaa in Dunida oo dhan la adoon sado kuwa wax adoon-sanaayana eey ahaadaan Qarankiisa ama bulshada oow ka dhashay

Dunida oo dhan hantidooda lasoo dhaco wax walba oo qeeyraad ah oo wadamadaas yaalo laga soo qaato.

Mana aamin saneeyn nidaamka Kursi haloo tartamo ee waxoow aamin sanaa in Boqor dadka xakumo weligiis ilaa oow kadhinto kadibna Wiilkiisa oow lawareego dhaxalka .

Hogaamiya-yaasha Ganacsiga wax dhib ah uma arkaan Adoonsi sidoo kale dhib kuma haayo Boqor ama Madax lasoo doorto waxa ugu muhiimsan eey marwalba ka fekeraan waa sidee Lacag lagu sameeyaa.

ninkii aaminsanaa in Aduunka oo idil hantidooda lasoo dhaco in uu fikir uusan leheeyn Buugaagtiisa ku qoro uusan sheegin halka uu kasoo xigtay iyo cida isaga kaga horeeysay wax dhib ah uma arko.

Taariiqda Culimada iyo Ganacsatada –Xakunka

Ogoow meel walba oo aad tagtid Ganacsato waa kuwo galaangal badan waxeeyna jecel yihiin in eey Xakunka u

dhiibtaan mid eey iyaga raali kayihiin .

Bulshadii oow ka dhashay Nabi Muuse isaga kadib waxeey hadal kamaqli jireen Culimada

ama Nabiga waagaas joogo hada kahor waxaa lasoo weeraray wadanka waxeeyna utageen Nabi waagaas noolaa Nabi Muse kadib waxeey kacod sadeen in oow magacaabo ruuxii wadanka hogaamin lahaa dhanka dagaalka iyo dhan maamulka Nabigii waxoow magacaabay ruux Bulshada kamid ah lkn qibrad dagaal leh aanan heeysanin wax lacag ah

Sida oow dhaqanka dadka Maalqabeenada yahay waxeey weligood jeclaayeen in iyaga loo magacaabo jagada hogaanka

Dalka ninkii lamagacaabay weey gadoodeen waxeeyna dheheen

Kan mid Lacag heesto ma ahan wadanka in oow hogaamiyo waa qalad waayo hadii Lacag loo keeno in oow iibsado wadanka ayaa laga yaabaa maadaama oow yahay mid baahan

Jagada anaga ayaa mudan in naloo magacaabo ama ruux qoos caan ah ka dhashay oo layaqaano beesha oow kasoo jeedo .

Nabiga ayaa yiri war badan iska daaya waxaan idiin maga caabay ninkaas ee ha idin hogaamiyo

Waa nin Rabi oow raali kayahay anigana aan raali ka ahay idinkana raali kanoqda ee kudawa feeyla

Qisada aan kaaga shee keeynay waa qisadii suurada Baqara kujirtay

DHAALUUD .lkn qisadaas agteeyda weey ka nasaqantay oo mid lagu dhaqmi karo ma ahan sababta dib ayaan kasoo sheegi doonaa , hadeer duleed baan ka istaagnay marbaan hoos udaadegi doonaa hadii Eebe idmo.



3 qolo waa in eey u adeegaan shacabka

#Nabi Aadan oo lasoo nooleeysiiyay Qarnigan

#Nabi Aadan oo lasoo nooleeysiiyay Qarnigan, lana xisaabtamay Caruurtiisa dhanka Lacagta maxaa dhici lahaa?

Afrika

wiilkiisii Afrikaanka ahaa waxoow u imaan lahaa isaga oo Gaari Dameer Foosto Biyo ah ku sido xoogaa Sanuud-ah Faraqa loo

soo geliyay , sidoo kale DIBI Beerta ku falo kuna dhegan dhaqankii Awoowgiis kaga dhintay , degan Cariish ama Sar 5 dabaq aan ka dheereen,

wax ku karsado Dheri sida oow dhaqanka yahay, Nabi Aadan marka oow intaas arko waxoow is dhihi lahaa waa dadaalay Wiilkaada oo 5 dabaq ayuu dul degay horu mar ayuuna ku dhaqaayay.

Yurub,USA, RUUSH.

Wiilkii Cadaa maba joogo dhulka. dadka ayuu weeydiiyay Ruush Wiilkii la dhihi jiray xaguu aaday? waxaa loogu jawaabay Diyaaradaas hawada gashay ayuu wade (duuliye/ buubiye)kayahay!

Nabi Aadan waa xanaaqi lahaa oo waxoow dhihi lahaa doqon-nimo heerkaas gaartay ma arkin Cerka miyuu falaad u aaday waxa Wiil Afrikaan Fuusto Biyo ah Dameer dul

saartay! . Aadan waxba isaga oon hubsan ayuu ka caroon lahaa kana agtegi lahaa Ruushka.

USA iyo YURUB Nabi aadan marka oow Gurigooda soo booqdo waxoow waayi lahaa cid oow wareesto ruux walba NET ayuu ku fooraa qaarka kale Xidiga Marso ayeey ku maqan yihiin xaafadii inta ku cidloodo ayuu kasoo tegi lahaa.

CARAB

waxaa loo imaan lahaa iyaga oo Geel dulsaaran Gabay u tirinaayo Ruux waa hore dhintay oo Carab kale ahaa ama Amaanayo. waxa intaas ka soo haray waa Geel Gabay ku amaan.ama gabay colaad kuhuri siiba colaad sokeeye.

Kacbada inta oow galo ayuu Kutub Quraan ah aqrisan lahaa halkaasna ku qaatumeeysan lahaa.

sheekada waa yaan lakala xanaaqin (qolo walba waxaa lagu qiimeeyay wax soo saar keedii Aduun ,tii Aaqiro Rabi ayaa

Miizaan saarayo Gaalna Naar ayuu ku dan beeynayaa

Muslimna Jano haduu wanaagsanaa)

#daaha gadaa shiisa sida wax looga maamulo

dhanka wanaaga aan ka fiirino .

-Cali waa nin Jaamacad ka soo qalin jebiyay

waxoow kutaqa susay sida Ganacsi loo sameeyo lkn mahelin

meel oow kashaqa bilaabo

mana helin ruux maalgelin usameeyo waxoow bilaabay

in oow qabto koorsooyin bilaash ah dhalinyarada xaafada

ayaa ka soo qeeybgeli jirtay

Muxaadaradiisa dadka kasoo qeeyb galaayo waxaa kamid ahaa

dhalin yaro reerkooda eey ladan yihiin

fikirkii Cali ayeey dhali yaradii qaateen waalidiin-tooda ayeey

Lacag deeyn ah ka qaateen waxeeyna bilaabeen in eey

Shirkado xaafadii kayagleelaan

markii eey shirkadihii eey bateen kadib Cali xaafadiisii waxeey noqotay meel shaqooyin laga heli karo .

Cali hadii Cilmigiisa oow meel lafariisan lahaa xaafada waxba iskama bedeli leheeyn

balkawaran Cali hadii oow soobaran lahaa sida dhalinyarada loo daroogeeyo(wehsi kubeerid)

Dhalin yarada halkii eey ka doodi lahaayeen ,Faras Beer in lagu falo xaaraan miyaa mise waa xalaal ?

Waxeey ka doodi lahaayeen Hilibkiisa in aan cuno Faraska ma inoo xalaal baa mise waa inaga xaaraan ?

Hantida eey heesteen ee 1 ka Faras ahaa , ayeey sidaas ugu doodeen halkii eey kafekeri lahaayeen si dii eey Ku heli lahaayeen mid 2aad iyo qaabka ugu haboon ee xooga faraska looga faa`iideeysan karo.

#Faqiir iyo Taajir maxaa kala heesto -Habaar

marka Beeraha eey noobaxaan marka Guryo waa weeyn oo umada aanan qaali ku eheeyn aan helno marka maaciishada eey noo raqiisto marka faqiir dunida laga waayo waxaa dheceeyso in aan habaartano oo aan dhahno Rabiyoow Umada waad wada sintay waa lakala garan waayay, ruux walba Gaari iyo guri iyo arzaaqad bilaa xuduud ah ayaad siiday ruux noo shaqeeyo waan la nahay ee qaarkeen faqiir kadhig si aan u helno wax inoo shaqeeyo si eey Lacag nooga qaataan.

markaas boow Rabi colaad keenayaa wadooyinkii aaminka ahaa ee habeenkii lagu dhex lugeeyn jiray eey noqonayaan kuwo maalintii laga cabsado magaaladii aad ku tegi jirtay 30 daqiiqo eey kugu qaadaneeysaa in 3maalin usii lugeeyso Gaari la`aan

Guryihii dhoowrka dabaq ahaa inta ladudumiyo ayaad kajiifaneeysaa Teendho

لَقَدْ كَانَ لِسَبَإٍ فِى مَسْكَنِهِمْ آيَةٌ جَنَّتَانِ عَن يَمِينٍ وَشِمَالٍ كُلُواْ مِن رِّزْقِ رَبِّكُمْ وَٱشْكُرُواْ لَهُ بَلْدَةٌ طَيِّبَةٌ وَرَبٌّ غَفُورٌ.

فَأَعْرَضُواْ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ ٱلْعَرِمِ وَبَدَّلْنَاهُمْ بِجَنَّاتِهِمْ جَنَّتَيْنِ ذَوَاتَىْ أُكُلٍ خَمْطٍ وَأَثْلٍ وَشَيْءٍ مِّن سِدْرٍ قَلِيلٍ

وَجَعَلْنَا بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ ٱلْقُرَى ٱلَّتِى بَارَكْنَا فِيهَا قُرًى ظَاهِرَةً وَقَدَّرْنَا فِيهَا ٱلسَّيْرَ سِيرُواْ فِيهَا لَيَالِىَ وَأَيَّاماً آمِنِينَ

فَقَالُواْ رَبَّنَا بَعِدْ بَيْنَ أَسْفَارِنَا وَظَلَمُواْ أَنفُسَهُمْ فَجَعَلْنَاهُمْ أَحَادِيثَ وَمَزَّقْنَاهُمْ كُلَّ مُمَزَّقٍ إِنَّ فِى ذٰلِكَ َلآيَاتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ

[surada –Saba/15/16/18/19]

labo walaal marka midna hanti leeyahay kan kalana oow yahay mid gacma maran

.kan hanti la`aanta ah waa mid canaan badan oo waxoow walaalkii ku canaan taa

In xaalada oow ku sugan yahay wax laga bedelo

Somalida iyo Carabta waa walaalo kuwa Khaliijka ee hantida

Rabi siiyay hadii aan

Canaanta ku badino mac naheeda ma ahan in aan neceb nahay.

Carabta xigmadooda waxey tiri

"العتاب هو غسيل القلوب"

#FAQIIR+TAAJIR

وَهُوَ ٱلَّذِى جَعَلَكُمْ خَلاَئِفَ ٱلأَرْضِ وَرَفَعَ بَعْضَكُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَاتٍ لِّيَبْلُوَكُمْ فِى مَآ آتَاكُمْ

[ancam.165]

وَٱللَّهُ فَضَّلَ بَعْضَكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ فِى ٱلْرِّزْقِ فَمَا ٱلَّذِينَ فُضِّلُواْ بِرَآدِّى رِزْقِهِمْ عَلَىٰ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُمْ فَهُمْ فِيهِ سَوَآءٌ أَفَبِنِعْمَةِ ٱللَّهِ يَجْحَدُونَ

[النحل)71]

Rabi Dadka qaarna Faqiir ayuu ka dhigay qaarkalana

Xoolo ayuu siiyay micnaheeda ma ahan in oow qaarna neceb yaahy qaarna jecelyahay

lkn si loogu imtixaano kii xoolaha lasiiyay ama Aqoonta lasiiyay kaalintiisii maka soo baxay mise?

Kan Hantida lagu yareeyay isagana waxaa la fiirinaayaa in oow sabray , Xasdin walaalkiisa sidoo kale oowsan ka quusan Raxmada rabi .

#Geel Nabiga deyn kusoqatay

عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رجلا تقاضى رسول الله صلى الله عليه وسلم فأغلظ له فهم به أصحابه فقال دعوه فإن لصاحب الحق مقالا واشتروا له بعيرا فأعطوه إياه وقالوا لا نجد إلا أفضل من سنه قال اشتروه فأعطوه إياه فإن خيركم أحسنكم قضاء

#B.

Xadiiskan dhoowr nuuc ayaa loo isticmaali karaa waxaan dhihi karnaa ruuxa deeyn hadii oow sooqaato dulsaar

waajib kuma ahan .

waayo Rasuulka neef geel ah oo 2 sano jir ah ayuu nin ka deeynsaday

marka oow deeyn baxaayay 2 jir mid ah ayuu ,u keenay

ee mid 3 sano jir ah uma oowsan keenin .

sidee loo ogolaadaa in oow qiimaha kordhiyo hadii oow lasoo daaho deeynta?

Nabiga waa lasoo daahay deeynta cidna madhihin Neefkii aad qaadatay mid kaweeyn noo keen.

hadii la ogolaado in ruuxa oow qiimaha kordhin karo.

maxaa diiday in la ogolaado in Ganacsatada eey sameeystaan Kaar BanGi

waxa lagu iibsan karo eey tahay oo kaliya, Raashiin ,Dhar ,Dawo wax walba oo aad ku iibsato qiimo dulsaar ah ayaa lasocoto waayo deeyn ayaad ku qaadaneeysaa alaabta.



Maxaa diiday in eey Gab-dhaha furtaan Dukaan lagu iibiyo ,Dhar ,Kobo, Raashiin

reer walba oo deeyn alaabta lagu siiyo bisha marka eey dhamaato alaabta oow qaatay hadii eey eheeyd $100 waxaa laga qaadayaa $150 waayo alaabta deeyn ayuu ku qaatay.

weey fududahay in wax walba Fatwo loo raadiyo lkn wadaadka inta oowsan ku fududaan

 fatwada waa in oow meelo badan kafiiriyaa . waxaas oo musiibo ah ee aan kor kusoo xusay waxeey kadhalan kartaa Fatwadii eey soo saareen Culimadeena

eey ku baneeyeen in Bangiga ISLAAMKA Deeyn laga qaadan karo deeyn dulsaar wadato.

qisadii gaariga:Gaar ayaan kuu soo iibinayaa lkn qiimaha suuqa uu maanta kajoogo mid kabadan ayaan Buuga kuugu qorayaa .

Maalka Cuno + dhar kaliya ma ahan

Xadiiska tilmaamay in Maalkaada waxa aad ku leedahay eey tahay

waxa aad Cuntay & Dhar aad xiratay oo kaliya kadibna aad Aakhiro ka aadeeysid.

Xadiiskaas inlagu mashquulo waxaa ka wanaagsan in Aayada

waxa eey tilmaantay lagu mashquulo

Dunida maanta siyaabo badan ayeey Lacagta u isticmaashaa. kaliya Dhar iyo Cuno looma isticmaalo Lacagta.

1) tirisbood ayaa la dhiibaa Diyaarad ama Gaari ama shidaal

2) Iskuul ayaa Lacag lasiiyaa si macalinka Maankaaga udhiso

aqoon tayo leh kuubaro

3) Iskuul Jirdhis ayaa latagaa si Muruqaada ukoro Lacag ayaana lagu baxshaa.

4) Dumar ayaa lagu guursadaa Shahwadaada rabitaanka Dumarka si aad dawo ugu heshid Lacag ayaana lagu qarashgareeyaa

5) Guryo ayaa lagu dhistaa .

6) Caruur xanuunsan ayaa Isbitaal lagu geeyaa ama adiga oo xanuun la liito ayuu Dhaqtar kuu soo qoraa Dawo, Lacag boowna kaa qaataa.

waxaas aan soo tilmaamay oo dhan waxaa laga dhex fahmi karaa Aayadaan

زُيِّنَ لِلنَّاسِ حُبُّ ٱلشَّهَوَاتِ مِنَ ٱلنِّسَاءِ وَٱلْبَنِينَ وَٱلْقَنَاطِيرِ ٱلْمُقَنْطَرَةِ مِنَ ٱلذَّهَبِ وَٱلْفِضَّةِ وَٱلْخَيْلِ ٱلْمُسَوَّمَةِ وَٱلأَنْعَامِ وَٱلْحَرْثِ ذٰلِكَ مَتَاعُ ٱلْحَيَاةِ ٱلدُّنْيَا وَٱللَّهُ عِنْدَهُ حُسْنُ ٱلْمَآبِ[عمران14]

Hanti hel Aaqiro kuwaay sidii Qaaruun oo kale waaye waxa

ladiidan yahay lkn

Lacag maxeey tartaa hadii layiraahdo?

Lacag wax kale matarto aanan eheeyn

Bini aadanka ha isku Qidmeeyo

.# Nabiga Nin Yahuuhi eh ayuu Alaab deyn uga qaatay

Yahuudigii waxoow yiri

Ku aamini maayo ee Rahan ahaan alaab aan kaaga haayo ii keen. Nabiga Alaab ayuu siiyay Ninkii Yahuudiga ahaa si oow ugu sii heesto Rahan ahaan .#B.

Lacala kasoo qaad Nabiga in oow manta nool yahay

Waxoow tegay Baqaar deeyn ayuu ka qaatay Rahan ayuuna ureebay Baqaarkii

3maalin kadib Nabiga ayaa deeyn kii keenay lkn waxaa laguyiri alaabtii qiimihii aad ku qaadatay

Maanta ma joogto Shidaalka ayaa qaaliyoobay Dolarkana hoos ayuu udhacay

Qiimihii shalay lagugula hishiiyay kabadan ayaad dhiibeeysaa hadii aad diidid

Alaabta rahan ahaanta lagaaga haayay ayaa laxaraashayaa!.

Waxeey ila tahay aniga in oowsan aqbali leheeyn Nabiga sheekada noocaas ah

Waayo Baqaarkii Balan kabax ayuu sameeyay .sheekada noocaan ah waa sheeko cakiran

Culumada maanta nool in eey xal u helaan looga baahan yahay Waayo sicirka maalin walba waa isbed bedelayaa.

Shalay hadii Barmiilka shidaalka $150 oow ahaa maanta waa $200

Beri laga yaabee in oow tago $100 .

Lacala kasoo qaad in Awoowgaa shidaal deeyn ah oow kasoo qaatay Sacuudiga sanadka marka oow ahaa

1970 qiimaha Barmiilka shidaalka ah waxoow joogay waagaas

$6

Awoowgaa waa oow dhintay deeynka lagu leeyahay waa

3marka oo Shidaal ah

Taariiqda maanta waa 2004

Qiimaha shidaalka waa $100 halkii Fuusto.

Deeynka $6 in aad bixiso miyaa mise waa in aad bixiso qiimaha

oow maanta joogo?

#Safka Salafiyiinta bal aan jaleecno

البيع بالتقسيط ...

C/raxman Cab-dal Khaaliq(Kuwyt)

القول الفصل في بيع الأجل

Sheeq Salafi ah marka oow xanaaqo Kutub kiisa sidaas ayuu

Cinwaan uga dhigaa .

Ciyaal nimadeenii waxaan dhihi jirnay " Kalabax Kutubada eey

kuqorantahay"

Moowduuca waxoow ku saabsan yahay qolo ayaa waxeey baneeysay in

Deeyn ruux lasiin karo iyadoo Qiimaha alaabta eey suuqa kajoogto kabadan laga siinaayo

Shekada hoos ku qoran marka hore waxaan ku bilaabeeynaa qolada kale sida eey aaminsan yihiin

Kadibna Sheeqa ayaa ujawaab celinaayo Kadibna anigana ayaa fikirkeeyga ka dhiiban doono qeeybta ugu banbeeyso.

Nabiga 2 arin kaladooro hadii ladhaho midkii fudud ayuu dooran jiray

hadii eeysan denbi eheeyn .

Caqliga waxoow sheegayaa in beeca noocaas ah oow banaanyahay sharci ahaan

Waayo ruuxa ganacsadaha ah xor boow uyahay in oow qaali

kasiiyo hebel.

Sidoo kale xaq boow uleeyahay in oow Raqiis uga dhigo ruux miskiin ah ama eey isku fiican yihiin

Taas waxaa lamid ah in oow qiimaha ku kordhiyo ruuxa deeynta lasoo daaho

raqiisna oow kasiiyo ruuxa Kaashka wato ee aanan deeyn ubaahneeyn.

Faa iido ayaa 2 dhanba eey ka helayaan

Waayo deeyn ayuu alaabta ku qaadanayaa kan aanan heeysan Lacagta lkn Qaali ayaa looga dhigaayaa maadaama oowsan Lacagta Kaash wadan.

Qofka alaabta iska iibinaayana waxoow helay qof alaabta ka iibsado maadaama eey Deeyn tahay

Lacagta ayuu ku kordhinayaa waayo Lacagtiisa ayaa Qaanada ugu jirin oo ruux kale ayeey jeebka ugu jirtaa .

قال ابن ابي شيبة :سَأَلْت الْحَكَم عَنِ الرَّجُلِ يَشْتَرِي مِنَ الرَّجُلِ الشَّيْءَ فَيَقُولُ : إِنْ كَانَ

بِنَقْدٍ فَبِكَذَا ، وَإِنْ كَانَ إلَى أَجَلٍ فَبِكَذَا ، قَالَ : لاَ بَأْسَ إذَا انْصَرَفَ عَلَى أَحَدِهِمَا.

_____

قال الشافعي في الأم :(وَمِنْهُ ـ بيع الغرر ـ أَنْ أَقُولَ سِلْعَتِي هذه لَك بِعَشَرَةٍ نَقْدًا أو بِخَمْسَةَ عَشَرَ إلَى أَجَلٍ فَقَدْ وَجَبَ عليه بِأَحَدِ الثَّمَنَيْنِ لِأَنَّ الْبَيْعَ لم يَنْعَقِدْ بِشَيْءٍ مَعْلُومٍ)

_____

C/raxman Cab-dal Khaaliq(Kuwyt)

.Sheeqa mar oow arinkaas ka jawabaayay waxoow yiri sidan

Ribo waxa loo diiday waxeey tahay ruux baahan oo miskiin ah ayaa

$100 inta Deeyn lagu siiyo ayaa la leeyahay $120 keen beri

Ruuxaas $100 la amaahiyay iyo kan alaab deeyn ah oo qiimo kordhin lagu sameeyay laga iibiyay

Maxeey isdhaamaan?

labadoodaba dhib heestay si eey uga baxaan ayeey Deeyn uqaadanayaan

Nina maqaadan laheeyn hadii oow helaayo meel eey isku mid

yihiin Qiimaha hadii eey Deeyn tahay iyo hadii eey tahay Kaash.

"قال رسول الله[ص]لا يحل بيع وسلف ولا شرطان في بيع ولا بيع ما ليس عندك.

.#Axmad .

wadaad kaas Salafiga ah waa uu diiday deeyn laqaato qiimaha oo lakordhinaayo.

Dooda hadii aan qeeyb teeyda ka qaato waxaan leeyahay sidan.

Dhagax hadii magaca laga bedelo ee loo bixiyo Suuf sidaas jileec kuma noqonaayo

Dhagax nimadiisa ayuu taagnaa-nayaa

Hadii RIBO magaca laga bedlo ee loo bixo RUUBI anaga RIBO ayaan ugu yeereeynaa.

>**Qiso Khiyaali ah** <

Cali waxoow Dukaan ka furtay Suuqa Dunaakna alaab ma lagu

iibiyo

ee Deeyn ayuu dadka siiyaa

Hadii aad u tagtid ee aad dhahdid waxaan rabaa$100 waxoow ku leeyahay maxaad ku soo iibsan rabtaa iisheeg?

Hadii aad usheegtid Alaabta aad ku soo iibsan leheeyd Isaga ayaa baxaayo oo suuqa inta oow tago kuu soo iibinaayo alaabta

Waxoowna ku leeyahay $150 beri ii keen.

Alaabta oow kuu soo iibiyay suuqa $100 ayeey ka joogtaa .

Sheekada noocaan ah Ribo maxeey dhaan taa?

Waa iyadii oo lafar sameeyay hadafka Diinta uxaaraan-tinimeeysay RIBO wax kale ma ahan

Waa yaanan Qiimo Qaali ah laga gedin ruux miskiin ah

Yaan $100 Kaash lasiinin oo lagu kalifin 120$ Ribo ah.

لا يجوز الاتفاق على شرط محرم كأن يتفقوا على إذا كان المدة سنة فالثمن مائة وإذا كانت المدة سنتين فالثمن مائتين وهكذا وينهوا الاتفاق على ذلك لقول ابا هريرة

رضى الله عنه { نهى رسول الله عن بيعتين فى بيعة } رواه الترمذى وصححه الالبانى

#Ganacsi sida oow kusoo biloowday

1000-2000 sano kahor.

Dadka waagii hore ma leheeyn wax lacag ah oo la isticmaalo

Waxa eey wax ku kala iibsan jireen

Hadba ruuxa waxa oow haayo.

Tusaale

ruux Geel dhaqdo hadii oow doonayo in oow wax ka iibsado

Ruux Beeraleey ah Geela Hilib kiisa ayuu uga bedelan jiray dalaga Beerta kasoo go`ay sida Digir Galeey Mazago.iwm

Waxaa dhici jirtay in ruuxa doonayo in oow dhar iib sado

Waxa oow suuqa keeni jiray neef Dibi ah

Waxaa loogu bedeli jiray Dhar .(1)

Hadii oow yahay Beera leey waxa oow suuqa keeni jiray

Kiintaal Galeey ah ama Sisin

Waxaana loogu bedeli jiray waxa oow magaalada ka doonayo in oow ka iibsado

Hadii eey wax u soo heraan waxaa laga yaabaa in la dhaho baaqigii kuu soo haray uqaado neef kaas

Ariga ah.

Dhaqanka noocaas ah meelaha qaar waa ku sii dan beeyaa oo ruuxii ukuurgalo waxoow arkayaa meelaha tuulooyinka ah ee aadka ufog ama baadiyaha.

in Dumarka eey kala qaadanayaan Sonkorta Cusbada Tamaadhada Bariiska .iwm.

Dowladaha mararka qaar waxaa la arkaa iyaga oo arinkaas oo kale sameeynayo

Tusaale: Somalida waxeey Sacuudiga u dhoofisaa Geel tiro badan

Waxaa laga yaabaa halkii Lacag lasiin lahaa in eey Shidaal ku bedeshaan.

Mooska loo dhoofiyay ITALI in Gaadiid laguugu soo bedelay laga yaabee.

Wax yaabaha aan kor kusoo xusay ma ahan taariiq dhaw markii eey Dunida ka jireen. 1000 sano ama 2000 sano kahor ayeey meelaha qaar ka jireen dhaqan kaas.

taariiqdii fogeeyd ee Somalida Kutubadii laqoray 1000 sano kahor ayaad ku arki doontaa Somalida iyagoo qaabkaas udhaqmaayo.

---

dhaqashada Xoolaha

dhaqanka sida oow yahay

qoos walba waxa oow xanaa neeyaa Xoolo sida Ariga

+Geela + Lo`da. iwm.

Geela waxa oow daaqaa geedaha qeeybtooda sare

Ariga waxa eey daaqaan Geedaha qeeybta hoose

Lo`da waxa eey daaqdaa coowska dhulka kuyaalo

Intaas oo dhan waxa aan ka heleeynaa Burutiin jirkeena ubaahnaa

oo hadii la dhihi lahaa Geedka isaga oo cagaran Bini aadanka hasoo daaqo sidii Xoolaha masuura gasheen

lkn marka eey xoolaha soo daaqaan

Ayaan Caanahooda cabnaa Hilibkooda cunaa

Waxaas oo dhan Samada ayuu Rabi ka waraabiyaa oo 10 sano hadii oow Rabi wax roob ah Dunida ugu deeqin dadka iyo Duurjoogta dhamaan in eey dhintaan ayeey halis u yihiin

Yurub + USA + Ruushka Rabi Baraf ayuu Roob uga dhigay hadii Baraf la waayo beerihii ubixi maayaan.

Webiga Niil Biyaha oow wado waa roob meel kale ku soo

da`ay .Dunida Biyo ayeey ku nooshahay sida Rabi inoo sheegay.

و في السماء رزقكم

---

(1)waxaan ku nool nahay Duni Mobilka lacag laguugu soo diri karo Kaar Bangi eey lacag kuugu jirto

Dumarka eey xiran yihiin Dahab. E-mail lacag laguugu soo diri karo

---

ABUU,BAKAR MADAXWEEYNIHII

SOMALIYA,sanadka1300.M.



madax weeynaha waxoow ahaa nin og waxa dunida kasocdo

Waqtigiisii Mangooliya ama SHIINAHA ayaa Caalamka

Islaamka duulaan adag kusoo qaadeen

Sidaas ayaa keentay in Xudduda la adkeeyo ruuxii Doon kusoo

galo in loo sameeyo guri oow kudego

Si loola socdo dhaq dhaqaaqiisa hadii eey wax soo gaaraan

waxaa lagala xisaabtamayaa

Nin kii oow kusoo degay

Waxaa xusid mudan in Mangooliyiinta dagaalkooda oow

kabiloowday

Ganacsato reer Mangooliya ahaa oo lagu dilay dhulka Carabta

waloow eey SHIINAHA kusoo marmarsoodeen sheekada nuucaas ah

Si taas ookale eeysan u dhicin ayuu amaanka u adkeey madax weeynaha.

si qofkii soo galo oow unoqdo mid amaan kiisa eey Dowlada ka masuul tahay iyo Qabaa`ilka oow ka dhex ganacsanaayo.

Xuduud la adkeeyo waa waxa eey ku dhisan yihiin maanta wadamada horumaray

Waxaa xaqiiqo ah in Wadamada qaar eey Xamar kaga horeeysay Xuduuda oo la adkeeyo iyo Dal amaan ah.

#Gaalka Ganacsiga u yimid Gurigiisa nabad ku gaar sii

وَإِنْ أَحَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى يَسْمَعَ كَلَامَ اللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ

[التوبة 6]

Somalida waxeey kumaah maahdaa" Bada hal malaay aa

Qurmiyo"

Gaal Wadanka soo galay amnigiisa Umada oo dhan ayeey utaalaa ee Dowladii markaas jirto kaliya kama masuul ahan Dowlada markaas jirto waa in eey hubisaa ruuxa eey VISO siineeyso ruux Fisqi & fujuur usocdo miyaa mise waa ruux umada in oow hurumariyo usoco . ganacsi xalaal ah ayuu wadanka usoo galay.

Somalida dhanka Dumarka +Diinta waa eey ku ad adag yihiin dhaqanxun kuwo udulqaato ma ahan hadii aad aragtid iyaga oo xumaan ka aamusan

ogoow waxeey ku mashquulsan yihiin sidii eey uga taqalusi lahaayeen maamulka ka masuulka ah xumaha Wadanka lakeenay.[qisooyinka ku saabsan qaabkii eey unoolaayeen Somalida 1000 sano kahor **Seeylac iyo Xamar** iyagoo faah faahsan qeeybaha danbe ka aqriso.]

.

#XAMAR MAXAA REE BAADIYE EEY UGU BATEEN

Laga soo bilaabo 1330 ,M. sida Ibnu-Khalduun noosheegayo Muqdisho waxaa lagu tilmaami jiray meel ganacsi lkn Ree magaalka kuyaryahay eeyna ku hardamaan Ree miyiga. hadaba maxaa keenay dhaqanka noocaas ah?

moowducan marka laga hadlayo dadka qaar ee la buko qabyaalada waxeey moodaan in Qa`biil gaar ah weerar lagu yahay kuwa sidaas u fekeraayo waxaan leeyahay

Xamar waa caasimada Somaliya shalay iyo maanta

Caasimada micnaheeda waxaa loola jeedaa meel aan Qabiil gooni ah Goof u ahaan karin

waa dhul dadka kawada dhaxeeyo qaabka loo naqshadeeyay asalkeedii hore waa in Qabaa-ilka oo dhan eey kusoo wada hirtaan . Maqaar Sagaaro ma ahan Muqdisho " IIGA KAC MOOYEE AAN LEHEEYN IGA DURUG" .

maxeey ree baadiye ugu bateen Xamar?

Muqdisho waxeey lamidtahay gobolada kale ee wadanka .

Ree baadiye waxeey iskaga qeeyladhaamiyaan oo MADAD kahelaa Miyiga .

Muqdisho ree magaalka kunool meel eey MADAD kahelaan majiro.(MADAD= GURMAD)

horay waxaan usoo xusnay in Qabiilka oow ku baraaro Miyiga oowna ku dhinto magaalada.

Qabiilka halka oow geedi u yahay waa Magaalo.

Ree magaalka halka oow ku hamiyo waa hormar ee ma ahan mid oow ku beeranyahay laablakac . buufis nin oow ku qafilanyahay ma ahan geedi iyo meel kale uguur ama Dalkaba kadhoof .reer magaalka waa nin ku nool halka ruux walba oow hamiga ku haayay in oow ku noolaado.

magaalo ayuu degan yahay .

Ree baadiye maxeey ugu soo qaxeen magaalo?

"LAX DHUKAN ABAAR MOOG"ninka magaalada degan maba oga dhibka eey kusugan yihiin walaaladiisa reer baadiyaha ah.

ruuxa marka oow ku nool yahay meel Baadiyo ah waa mid kunool Beer falasho, Xoolo dhaqasho,Bada Kaluun kadabo.

hadii Ree baadiyaha eey xoola beelaan Beertii eey usoo bixi weeydo Roob yari darteed.

[GACAN MUGLEH MAGAALADA LAGA SIIN WAAYO]

Dowlad kaalmeeyso marka lawaayo

Xoolaha Biyo la`aan eey u ledaan

Neefka xoolo marka oow noqdo mid aan gaari karin halka coowka eey xoolaha ka soo daaqaan. eeyna qasab noqoto in Gaari weeyn inta loo soo kireeyo in la dul geeyo Coowska si oow usoo daaqo, tabardari darteed.

sidoo kale marka Neefka xoolaad safar dheer usoo maro in oow Coows helo

sida Neefka kunool Seeylac marka daaq oow udoonto Daroor iyo meel ka shisheeyso .

gunaanudka sheekada

nolosha waxeey ku dhisan tahay is-taakuleeyn

ree baadiye marka xoogiisa loo baahdo waa loo ciidan doontaa marka col wadanka soo weeraro .

waxaa laga doonayaa Reemagaalka in oow udulqaato walaalkiis Ree miyiga ah

dulqaadka waxaan ula jeedaa in loo dulqaato aqoon yarida dhanka Diinta Islaamka (1)

aqoonyarida dhaqanka Islaamka , dhaqanka ISlaamka , Salaada , Soonka , Dhiiga xaaraanta ah, Muqaadaraadka, wax aqrin la`aanta , Qabiil u habar wacashada marka oow xanaaqo ,

samir yarida marka oow xanaaqo iyo in sharciga oow u hogaansamo.

Nolosha magaalo waa shaqo, nolosha Baadiyaha waa Biyo .

waxaa nala gub-boon in Biyo ku filan loo helo Xoolaha iyo Dadka ku nool Baadiyaha si eeysan ugu soo hayaamin Magaalooyinka.

---

(1)IMAAM SHAAFICI waxoow dhahay qiil waa loo bixin karaa qof kusoo barbaaray Baadiye weligiis aanan magaalo arkin marka oow Diinta tiirarkeeda oow ugefo.5ta tiir. (waxaan leeyahay : Calmaaniga Galbeed ku barbaaray marka oow kuhadaaqo ereyo MULXID nimo ah waa in loo qiil dayaa.kaas waxoow lamid yahay Kaluun Biyaha kasoobaxay rajadiisa eey tahay in oow Biyo la`aan noolaado, ama Baraf Talaajo laga soo saaray laga dhursugaayo goorta oow dhalaalo.)
#Abuu Xasan al nadawi ayaa yiri" Rido aan Abuu bakar joogin ayaa jirto maanta".

Odaygaas jawaabta aan siinayo waxeey tahay "Khawaarij loo caal waayay ayaa iimuuqato Calina ka maqanyahay".

Nolosha milkiilaha Baska

-Rakaabka ayuu lacag ka helaa

-Shaqaale ayaa lacag ka qaato

-Shidaal oow ku shaqeyaa.

-Suuqa ayaa xakumo, laga yaabee in laga horeeyo doorkiisa aan lagaarin.

Wax soosaarka Magaalo.

kasoo qaad in Baska markiisii hore kuraasta kurakiban 10 kursi kaliya eheeyd

hadii aan badiyo Kuraasta oo aan kadhigo 20 kursi = wax soo saarkii ayaan kordhiyay

lkn Kuraas taas aan kordhiyay kama dhalan karto in Rakaabkii eey kordhaan

Waayo waxaa dhici karto in Rakaabka raaci lahaa lawaayo

waxeey ku xiran tahay hadba sida oow Suuqa yahay .

Waxaan ula jeedaa wax badan oo lasoo saaro waxba mataraan

hadii aan laheeynin Dadkii isticmaali lahaa

Foornada Rootiga dubto maalintii 100,000 xabo weey soo saari

kartaa iyo kabadan hadii

eey jiraan dad diyaar u ah in eey iibsadaan.

Reer Yurub + USA + Ruushka + Shiinaha hadii eeysan

heeynin meel eey alaabtooda u iib geeyaan

ama cid Lacag heeysato oo ka iibsato wixii eey soo saareen

waxeey ku qasban yihiin in eey yaree yaan

Wax soo saarkooda waayo Suuqa ayaa mar walba xukumo ee

Shirkada wax ma xukunto.

Inter-netka iyo Ganacsiga



Nedka waa sida Gaari aad Kursigiisa kireeysatay si aad uraacdid ama aad usaaratid alaabtaada si alaabtii aad saaratay eey kuugu tagto halkii aad rabtay.

Si kale hadii aan udhigno waxaan dhihi karnaa waa ruux laga kireeyay Guri 2 dabaq ah qeeybtiisa sare . ruuxii dabaqa milki ahaan ulahaana oow dagan yahay qeeybta hoose ee dabaqa.

Hadii dadka kuu imaanayo eey bataan waxaa lagu leeyahay dadkaada weey bateen meesha ciriiri ayaad ka dhigtay ee dadka kusoo booqanaayo mid walba kaqaad 1000.SHilin .Som.

bilwalba

Si shaqaalaha nadaafada ka shaqeeyo loo badiyo waayo meesha eey dadka kusoo bataan qashin kooda ayaa bato.

Sidoo kale waxaa hishiiska kamid ahaa in aadan saarin dabaqa dushiisa alaab culus sida Biro waaweeyn iwm taas waxaa lamid ah ruuxa Websadka leh hadii oow ku keeydiyo Websayd –kiisa Sawiro iyo Fiidiyoowyo waxeey lamid tahay ruuxii Biraha culus dabaqa dul saaray .waana in oow bixiyaa qarash ka-xoog badan midka eey dadka caadiga ah eey bixiyaan.



si kale hadii aan u dhigno ruux soo iib saday Falash qaado GB-32 , iyo mid soo iibsaday mid qaado GB-4

Sida eey ukala qaad ween yihiin ayeey Websaayd yadana ukala baaxad ween yihiin.

Somalida & WW.COM

Somalida malahan Websayd keeydinkaro wixii loo baahdo waayo qarashkaas xooga badan cid xamili karto ayaan jirin saa darteed in badan waxaad arkeeysaa Websaayd suuqa soo galay in mudo ah markuu hawada kujiray kadib leeska xiray .[sheekooyinka ku saabsan Tignoolajiyada qeeybaha danbe ayaan ku qornay ee ka aqriso.Tignoolajiyada iyo tubta toosan]

Calaamad +Sumad.(Logo)

Dunida qoom walba oo ku nool hantidiisa Sumad ugooni ah ayuu usameestaa

si looga aqoonsado waxyaabaha kale

tusaale aan usoo qaadano Magaalo walba iyo Caasimad walba

oo aad tagtid waxaad ku arkeeysaa

Sumad gaar ah oo xusuus kugu reebeeyso

Tusaale Maka hadii aad tagtid waxaa xusuus kugu reebayo

Kacbada

Madiina hadii aad tagtid Masjidka Xabiibka ayeey indhahaada

ku qaboobayaan.

Masar hadii aad tagtid Ahraamta ayaa lagu xasuustaa

Roma calaamad beey leedahay ugooni ah

UK+USA+Faransiiska dhamaan waa isku mid.

hadii Bini aadanka hanti walba Sumad ugooni ah usameestay

Rabi Dhulka oow milkiyadiisa leeyahay Sumad ma usameeyay ?

inta aan Kutub aqriyay ma arkin ruux Kutubkiisa kaga shee

keeyay arinkaas

hadii aan isku deyo in aan kajawaabo waxaan leeyahay haa waa

jirtaa calaamado oow Rabi

dhulka ukala sameeyay

tusaale

Baraaziil waxeey caan ku tahay dhulka keeynta ah ee lagu maga caabo

AMAZON.

Ostareliya waxeey caan kutahay Xeeywaanka yar ee Kangoro lagu magacaabo.

Afrika waxeey caan kutahay Webiga Niil+ Geel + Maroodi+ Geri+ Dad midabkooda noockale yaahy .

waxaa wax lala yaabo ah in duurjoogta waxa ugu Luqun dheer eey ku nool yihiin Qaarada Afrika Geela kunool Afrika waa oow kabadan yahay midka ku nool wadamada Carabta

Maroodi & Geri halka laga helo waa Afrika. waxaa wax lala yaabo ah in duurjoogta eey kasoo ag haajirto dunida inteeda kale. xoolaha intooda ugu Luqunta dheer waxa eey ka soo

agdooneen ninka Madoow agtiisa xigmada Rabi kalahaa ma aanan garan.koleey waxaan isleeyahay ninka madoow waa uu kanaxariis badan yahay ninka cad, aqoon uu bartay darteed kuma imaan lkn qalbigooda ayuu Rabi naxariis kubeeray Somalida aad ayeey uneceb yihiin Doofaarka hadana cid wax yeelo ugeeysato majirto Dalka ayuu nabad kudaaqaa , Eeygana waa lamid oo waaba lagu ugaarsadaa oo waxuu dilay ayaaba noo xalaal ah 7 jeerna lama dhaqo halka uu kaqaniino ugaarta uu dilay Eeyga. sida Imaam Maalig noo sheegay ana aan kuraacay .

وَمَا عَلَّمْتُمْ مِنَ الْجَوَارِحِ مُكَلِّبِينَ تُعَلِّمُونَهُنَّ مِمَّا عَلَّمَكُمُ اللَّهُ فَكُلُوا مِمَّا أَمْسَكْنَ عَلَيْكُمْ وَاذْكُرُوا اسْمَ اللَّهِ عَلَيْهِ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ
[المائدة 4]

.

#Beerta falashadeeda Diinta ayaa amaantay.

Rasuulka waxoow yiri hadii Qiyaamaha laguu soo sheego in eey

dhacday

oo Qoraxda Galbeed ka soobaxday Gacantaadana eey ku jirto Abuurkii Beerta aad ku abuuri laheeyd hadii aad Abuuri kartid Abuur .=

hadii Geedtalaal Gurigaada hortiisa adigoo ku talaali rabto Qiyaamaha dhaco ha ujoojin hoowsha ee Talaal .=Adiga oo 2 dhagax isdulsaarayo hadii eey dhacdo Qiyaamaha hoowsha dhameestir hadii aad awoodi kartid qabyo ha uga tegin.

Nabiga waxoow yiri Rabi waxoow jecelyahay midka marka oow hoowsha qabanaayo aan hagran ee hagarbaxo .

SHARCIGA SHAAQALAHA

[2016]

Nabi Suleeymaan markii oow waayay Shinbirkii Hud-hud ahaa

waxoow wacad kumaray inoow goowrici doono hadii oowsan keenin cadeeyn halkii oow ku maqnaa iyo wax lagu qanci karo. lkn ruux shaqo kaliya idinka dhexeeyso sidii shinbirkaas miyaa loogu goodinkaraa?

handadaad maqabataa ? jawaabta waa maya.

Nabi Suleeymaan maxaa keenay in oow sidaas uladhaqmo Shinbirka?

jawaabta waxeey tahay Nabiga waxoow ahaa Boqor laga heeybeesto

Dowladii Israa`iil waxeey jirsatay waqtiga oow isaga noolaa 1000 sano iyo kabadan

Aabahiis ayuu kadhaxlay Boqornimada mudo dheer ayuuna xukunka hayay

xukunka marka oow raago caado ayeey bulshada yeelataa dhaqan ahaan eey raacaan caadadaas waxeey tahay in ruux walba qaladka oow isaga galo ruuxkale aanan loo ciqaabin.

cadaalada ayaa sidaas ah. Aakhirana Rabi cadaaladiisa sidaas ayeey tahay iyadoo halkaas laga duulayo Shinbirkii qaladka oow galay isaga kaliya ayaa loo ciqaabi rabay ee Hud- Hud oo dhan hala soo uruursho denbi ayeey wadagaleen lama dhihin .

Rasuulkeena S,W,C.

qaabkaas ulama dhaqmin markii Askarigii waardiyaha kuqornaa oow kasoo baxay waardiya-nimadii isaga oon loo fasixin qaladkii oow galay Askarigaas Saxaabada oo dhan ayaa loo canaantay Quraan ayaana kasoo degay.

hadaba maxeey ku dhacday in Askariga kaligiis loo ciqaabi waayo ?

Nabigeena qaab dhaqankiisa waxoow ahaa in Saxaabada siguud loo canaanto waayo sida badan hoowsha weey kawada dhexeeyn jirtay .

qisadii " Hilib geel ayaad cunteen ee dhamaantiin soo weeysa qaata "

waxeey daliil utahay in loo wada ciqaabay qalad oow 1 Saxaabi galay si loo qariyo ceebtiisa.

Nabiga marka oow shir-Jaraa`id qabanaayo ee damaciisa yahay in oow ruux canaato si wadar-ah ayuu dadka oo dhan uwada canaanan jiray .

Carabtii nabiga oow lanoolaa waxeey ahaayeen Qabiilo mudooyin badan colaadi dhextiilay

dhaqanka Qabiilka waxoow ubadan yahay in aanan lacanaanan shaqsiga marka oow qalad galo

sida badan lama dilo marka ruux Qabiilka katirsan oow dilo walaalkiisa ku Qabiilka ah ,ee waxaa lakala qaataa Diyo caadada Qabiilka waxaa kamid ah in Xabsi lagu xakumin wiilka marka oow qaldamo sidoo kale Diyada waxaa dhiibayo Tolka ee shaqsi kaliya madhiibayo

isku soo duub Qabiilka Wiilka ma ciqaabo .

Nabiga Diinta loo soo dhiibay ciqaabta eey duldhigtay ruuxa

Muslimka ah waa lawada ogsoon yahay waa wax aan lasoo koobi karin

si shacabka eeysan uga didin Diinta Nabiga shaqsiga canaanta waa kadhoowri jiray waayo maskaxda ruuxa markaas qaatay Diinta waxaa ka dhex guuxeesay xurnimada oow Tolkiisa ku dhex heestay , Carabta waa Geeleey mana jecla awaamiirta badan .

Nabiga dhib badan ayuu kala kulmay Carab waayo waxeey ahaayeen dad dhaqankooda iyo qaabka eey u fekeraan eey ku dhisan tahay qaabka oow u fekero ruuxa Miyiga ku koray weeyna adag tahay sida wax looga dhaa dhiciyo dad ilbax nimada eey ku yartahay .

Diita Islaamka (IQRA) ayaa laga bilaabay waxaa waajib looga dhigay in eey wax aqriyaan Umada Islaamka Dumar iyo Rag waxaa ku waajib ah in eey bartaa qaabka wax loo qoro waxna loo aqriyo .

Harqaanlaha qaabka oow wax u ciqaabo

Shirkada Aaw maneeno ee Dawaarka dharka lagu tolo marka lagaaro xiliga CIIDA shaqaalaha looma ogolaado in eey qaataan fasax waayo macaamiil farabadan ayaa Dhar loo tolayaa. Dharka waa kuwii lagu ciidi lahaa

Shirkada waa shirkad lagu kalsoon yahay qaabka eey wax utosho magaalada oo dhan ayeey ka tilmaaman tahay Macalimiinta Shirkada kashaqeeyso waa kuwo mudo dheer Harqaanka kasoo shaqeeyay lkn Macalinka wax matolo sida badan waxa dharka tolayo waa wiilashii oow isaga wax soo baray isha ayuu ku hayaa sida hoowsha loo wado .

Shaqaalaha goormee ayeey fasax helaan ?

shaqaalaha bil walbo waxeey leeyihiin 2 maalin oo fasax ah sidoo kale waxeey helaan waqti eey maqnaan karaan

marka eey shaqeeyaan saacado badan sida 100 saac hadii eey shaqeeyaan ruuxa waxoow helayaa 5 saac oo maqnaan karo ama oow kategi karo shaqada oo socoto hadii oow ubaahdo in oow Guriga aado lkn wax Lacag ah ma qaadanayo saacadahaas oow maqan yahay .xiliga ciida laga baxo fasaxa shaqaalaha ayaa badan oo shaqada ayaa yar cidna lama canaanto maxaad umaqnaatay darteed.

 # SUUQ-GEEYN , IS-FALISAAD

Xadiis ayaa jiro Nabiga laga weriyay waxoowna leeyahay 2 beec ku hishiisay hakala dhantaalin oo falisaad haku sameeynin ruuxii wax iibsan lahaa.

Xadiis kale ayaa jiro waxoow leeyahay Wiil iyo Gabar guur ku hishiiyay falisaad haku sameeynin oo shukaansigii kadhaxeeyay sheeko kale haku dulfurin.

walaalkaa Muslim -ah gabar oow guur kula hishiiyay haka dulqaadin.

intaas waxeey eheeyd nuxurka labada xadiis ee Nabiga laga weriyay .

labadaas Xadiis cilado ayeey leeyihiin

laba xiriir kadhaxeeyo in lakala dhantaalo maxeey diinta kaqabtaa?

Nabiga waxaa utimid Gabar waxeey tiri 3 wiil ayaan guur-isla meel dhignay

waxeeyna soo tirisay magacyada wiilashii eey is-shukaansadeen .

Nabiga gabadhii waa lataliyay waxoowna yiri

Mucaawiye waa Geeljire Gab-dhaha dilo iskadaa kaas.

ninka kale ee aad ii sheegtay kaas waa shiid oo hanti maleh iska daa isagana.

kii 3aad dhaliil ayuu, u yeelay Nabiga waxoowna kula

taliyay gabadhii in eey guursato wiilkale oo xaafada laga yaqiinay kana soo bixi karay dhaqashada reerka hanti iyo dabeecad ,

walool isagana lagu xanto in oow ahaa ruux aan qurux lagu raaco leheeyn lkn wax yaabo kale waa iska jireen Dumar eey ku qanci karaan.

halkaas waxaan kagaranay in eey banaantahay gabar aad guur kula hishiisay in lagaa dulqaadi karo marba haduusan jirin meher dhuuqsan oo dhexdiina yaalo.

Beeca oo leesku er-yo

Nabiga wiilkii faqiirka ahaa marka oow latalinaayay waxoow yiri, kac oo Xaabo soo gur ee suuqa keen kadibna iibi sidaas ganacsi kadhigo,

waatii Nabiga oow kadalbaday wiilkii in oow keeno Maro guriga utiilay wiilka si loo iibiyo

Nabiga ayaa beeciyay(naadiyay) maradii.

dadka qaar waxeey gaareen 1 dirham Nabiga mar walba waxoow dhahayay yaa waxkudaray oo qiima intaas kabadan gaaray halaga iibiyee?.

sheekadaas waxaa nooga soo baxday in Suuqa lagu tartami karo qiimaha aad gaartay qiime kasareeyo lagaari karo .

#Ereyada ku haboon in dadka lagu soo jiito.

Xadiiska Nabiga waxooow ahaa hadalka wanaagsan waa sadaqo .

we jifur-furnaata ama dhoolacadeeynta ama qalbi wanaaga walaalkaa aad kala hortagtaa waa sadaqo.

hadii ladoonayo in ruuxii Muslimka ahaa lagaqaado wixii oow jeclaa ee Lacagta eheeyd ee dhidid badan uga soo baxay sidii oow ku heli lahaa Lacagta waxoow mudan yahay in kalmado wanaagsan lagula dhaqmo.

Ereyada ku haboon in dadka lagu soo jiito.

noo imoow qiima kuraaligeliyo ayaan kuu heeynaa iyo Alaab tayadeeda sareeyso.

nasoo booqo gacmafuran ayaa laguugu soo dhaweeyn doonaa.

alaab tayadeeda sareeyso iyo qiima ku raali geliyo oo macquul ah ayaan kuu heeynaa.

Somalida waxeey dhahaan" Weji furan ayaa lasoo galaa ee Albaab furan lama soo galo"

waxeey ula jeedaan ganacsi ruux bashaash ah wejifuran ayaa kala socod siin karo .

 # ZAAD, E-DAHAB.

Adeega Zaad waa adeeg Somali gudaheeda kajiro dhanka Telfoonka lacag leeskugu xawilo ,

E-DAHAB ama Zaad ayaa loo yaqaanaa(mobil money

Tarnfer)

2009 kii ayaa labilaabay adeegsiga nuucaas ah

waa adeeg kuu sahlayo in aad Mobilkaada Lacag ku qaadatid oo Suuqa waxkaga iibsatid waa sida Kaar bangi oo kale

Gaari waad ku raaci kartaa .

ruuxkale Lacag waad udiri kartaa Mobilkaada Lacag waad ku keeydsan kartaa .

Adeega Zaad qeeyr miyaa mise waa qasaaro?

nimca walba nusqaanteeda ayeey wadataa marka labilaabay in la isticmaalo waxaa hoos udhacay qiimaha Lacagta Somalida waayo dadkii Lacag kaash ah jeebka in eey ku qaataan marabaan hadii Lacagtii cid isticmaasho lawaayo = Baqaar haku keeyd sanaato ayeey kadhigantahay booskii SHilinka Somaliga waxaa galay Nambaro eey Shirkad Umada u qeeybisay kaaga darane waxa lagu xisaabtamo waa USD ee ma ahan Lacag Somali.

Faa `iidada Zaad layimid

Tuug inta ku dhaco lacag makaqaadan karo oo lacagtaada meel xafidan ayeey ku jirtaa

ruux walaal ah ama qaraabo ah hadii Lacag aad uxawileeysid islawaqtigii ayeey gaareeysaa isagoo Geela lajoogo ama Iskuul dhex fadhiyo .

adigoo Suuqa ka adeeganyo hadii eey Lacagta kaa go`do gargaar degdeg ah Zaad ayaa ugu sahlan oo laguu soo dhigi karaa .

 # Qiimaha lagu dirto Telfoonka maanta & shalay

sanadka markuu ahaa 2000

qiimaha guryaha lagu geliyo Telfoonka waxoow ahaa $300

qiimaha lagu wacdo dibada waxeey ahaayeen laba Dolar iyo bar 1 minid

shirkadaha Telfoonada markii eey soo bateen wexeey bilaabeen dhaqankii ganacsato ucaadada ahaa suuqa ayeey ku tartameen qiima dhimis ayeey bilaabeen

$60 ayuu gaaray heerka gelinta Telfoonada guryaha

sidoo kale wicitaanka dibada 1-kii daqiiqo $1 ayuu noqday

Qiimaha eey isku wacaan dadka gudaha kunool

$1 hadii aad ku shubatid Telfoonkaada waxaad ku hadli kartaa 70 daqiiqo maalintii 100 daqiiqo habeenkii.

Wicitaanka dibada

$1 waxaad kuhadki kartaa 10 daqiiqo USA iyo Yurub.

maxaakeenay qiimajabka Telfoonada?

16-kii sano ee laga soo gudbay waxaa suuqa kusoo kordhay borograam (PC) sahlayo in aad bilaash kula hadasho dunida halkii aad rabtid in aad wacdid

SKYP, iyo kuwo lamid ah ayaa suuqa soogalay ,qofka hadii oow heesto qadka Internedka si fudud ayuu kula xiriiri karaa

qofwalba.

#GAADIIDKA Gaajo ka dheer

Marka Wadada amaan tahay ,Burcad eeysan joogin,

Laamiga shuban-yahay oosan kala koreeynin , dhulka oow maro eey ku yar yihiin Buuraha

Baska kaa qaado Banaadir si fudud Boorama kugu geeynayo , waa markaas marka Bulshada baraare gaartay.

Dhaqankii Somali nimo ee wanaagsanaa waxeey sheegaan, dadka qaar,

Oday ayaa Safar dhulka ah ku aadi rabay Xajka,

Gabadhiisa(inantiisa) ayuu ka dalbaday in eey u sameeyso Hilib oow wadada ku sii cuno ,

Gabadhii ayaa ku jawaabtay Aabe soco , dhim maleh dhul walba oo aad martid reerka aad ka dhalatay ayaa kaaga horeeyo ,

sooryo iyo soo dhaweeyn iyaga ayaad ku leedahay waxba sahay haqaadan Aabe!

waa runteed Gabadha sida eey hadalka u dhigtay waloow sheekada khiyaali tahay (Xaj Soomali weligeed kuma aadin safar dhulka ah)

lkn hadii aad u laabatid dhaqankii Somali sinjiga u lahaayeen waxaad ku arki doontaa dad

sharfan soona dhaweeyo cidii musaafur ah " abaalna kaama rabo in aan ku amba-bixiyo waa dhaqankii Awoowayaal" Somali beey u dhaqan tahay sidaas .

dhibka kala qoqobnaanta leedahay

وَجَعَلْنَا بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ ٱلْقُرَى ٱلَّتِى بَارَكْنَا فِيهَا قُرًى ظَاهِرَةً وَقَدَّرْنَا فِيهَا ٱلسَّيْرَ سِيرُواْ فِيهَا لَيَالِىَ وَأَيَّاماً آمِنِينَ

Waxaa meesha ku cad marka bulsho eey isku dhex safri karto , eey jirto wado Ganacsi ku aamin ah

Gabar musaafur ah aan waxba lagu yeeleeynin , Wiil aano loogu dileeynin,

Birta oow ku socday Gaariga Bililiqo loo qaadaneeynin ,

Bulshada nabadaas ku nool ayaa Ganacsi kobcay ku naalooto .

فَقَالُواْ رَبَّنَا بَاعِدْ بَيْنَ أَسْفَارِنَا وَظَلَمُواْ أَنفُسَهُمْ فَجَعَلْنَاهُمْ أَحَادِيثَ **وَمَزَّقْنَاهُمْ كُلَّ مُمَزَّقٍ** إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ

(surada –saba)

Dadkii xumahooda bato (Qabiil kufaanka Dhiig daadinta.

isku garabsiinta xaaraan raadinta)

Xaafad xaafad ayaa loo kala jarjaraa waa Suno Rabi

waa qaanuunkii Rabi Gaal iyo Muslim cid walba ayuu qabanayaa .

Marka xaafada Deriskaada ah aad Alaab kasoo amaahan kartid wax kasoo iibsan kartid wax ka iibin kartid niyada leeska jecelyahay ayaa baraare lagaaraa

Ganacsigana koraa bulshadana faceed ufaantaa , loona soo shaqa tagaa

Hadii taas eeysan dhicin ,Reebaadiyaha colaad la dhex dhigo waxa dhacaayo Somali cashar ku filan weey qabtaa 1000 sano eey Jaamacadaha ka dhigaan, Somali xusuusin uma baahna.

BEER ,BIYO AYEEY KU BAXDAA BIRNA WAA LAGU FALAA

NABI AADAN ISAGA AYAA UGU HOREEYAY NIN QABTO DAABKA YAANBADA = fikirka dhahayo Dunida waa in loo qeeybiyaa 3 qarni waa wax ka soo horjeedo in Aadam oow ahaa Beero falato caqli badan, kana caqli badiyay Sheydaankii duufsaday waatii Aadan baryada EEBE ka ajiibay marka oow katoowba keenay denbiga oow ku dhacay halka Sheydaan ku adkeestay moowqifkiisa madax adeeyga ahaa waana mida oow ku muteestay Naar.

Ilbaxnimada sii kordheeyso ee Bini aadanka waxeey usii horseedeeysaa in oow wax kabarto taariiqda siiba dhibka badan ee lasoo maray .

mar walba oo dhib soo ziyaado waxaa laraadiyaa sida ugu dhibka yar ee looga bixi karo

dhibkaas jiro xal uraadintiisa dadka qaar weey dhibsadaan oo waxeey doorbidaan in Dunida halkeeda taagnaato

ama loo noqdo sida maanta loo dhaqmo si kasii liidato.

moowduuca aan ka hadlirabo ee aan maanka ku haay waa

Shidaal, iyo Tignoolajiyada maalinwalba sii koreeyso daaqado qafil ku dheganaa maalin walba daaha ka feeydeeyso Dastuuro eey Dowlado ku heshiiyeen Tignoolajiyadan qasabtay in dib loogu noqdo

waxna laga bedelo qodobo duugoobay ee Umad maalin kuwada hishiisay.

Tignoolajiyada qaangaarka noqotay waxeey xal

uraadindoontaa Shidaalka Dhiiga badan ku daatay. Shidaalka noqday midka subax walba eey kawada shee keestaan 2 meel ku kulantay Reemagaal iyo Reebaadiye waxa eey hadal hayaan Shidaalka maxaa laga soo sheegay?

_____

MUSTAQBALKA WAXA XIGO SHIDAAL!

maalin waxaa Dunida soo martay aan la aqoon Shidaalka waxtarkiisa.

Shidaalka ma ahan Coows iyo Biyo aanan Nolosha looga maarmin

sida Rabi noogu goodiyay " Biyaha waxaan ka dhignay Noole walba waxa oow kunoolyahay"

RABI ayaa sidaas Quraanka ku sheegay. Rabi madhihin Shidaalka waxaan kadhignay mid noole walba noloshiisa eey ku tiirsanaato.

BAZIIN, GAAS, NAFTO, DHUXUSHA DHULKA LAGA QODO,

waa 4 taas waxa ladoonayo in laga guuro lana raadiyo waxa bedeli lahaa

Somali badan waxeey aaminsan yihiin in Wadamada Carabta eey kahortaagan yihiin in Shidaalka wadanaka Somaliya kujiro lasoo saaro aragtida nuucaas ah Somali oo kaliya ma rumeesna waxaa sidaas si lamidah aaminsan SUUDAAN, KENYA, TANZANIYA.

hadii Carab eey is-hortaagtay in Somali shidaal loo soosaaro Carab ma ku-dhacdaa in eey horjoogsato Tignoolajiyada casriga`ah ee lagu baarayo wixii bedeli lahaa Shidaalka Dunida laga isticmaalo? jawaabta waa maya.

Aragtida Somalida iyo walaaladooda Afrikaanta kale waa riyo eey ku riyoodeen in Carab u diidan tahay wax soosaarka dalkooda oraah waxaa jirto dheheeyso" Shacabka maalin hadii

oow baraarugo danta guud Qabiil is-hortaagi karo majiro, cadaw dibada laga soo abaabulay Sil-silad kuma xiri karo Shacabka "Somali ma ahan kuwa xigmadaas eey ka hadleeyso ee waa Wadamada Qaan-gaarnimada ka koray .

Dunida waxa eey maanta sii hormarineeysaa Korontada laga dhaliyo

QORAXDA, tan DABEEYLAHA, tan Biyo xireeynada, iyo mida NUGLIYEERKA.

Qarnigii tegay isbe-delkii dhacay dhanka Shidaalka

1890 waxaa labilaabay in Koronto laga dhaliyo Biyo xereenada

1895 waxaa laga qashinbaxay in Qoryo lashito (Xaabo) waxaa lagu bedelay Dhuxusha Dhulka laga qodo.

1950 waxaa Dhuxushii bedelay Shidaalka maanta Dunida laga isticmaalo

1955 Nugliyeer in Koronto laga dhaliyo ayaa bilaabatay.

#Aqoonta iyo Quudka isku xiran .

cusbooneey-siinta aqoonta

Nabi Muse ayaa laweeydiiyay yaa ugu aqoon badan? aniga cid iga aqoon badan aduunkan kuma ogi ayuu ku jawaabay, waayo 5ta ugu darajada sareeyso ayuu ku juraa isaga iyo Ciise , Muxamad, Ibraahim, waxa darajadaas sare eey ku gaareen waa aqoon waayo waxaa lasiiyay Kutubo = aqoon wax ku hogaamiya ayaa layiri.

Nabi Muuse waa loo jawaabay waxaana layiri waa lagaa aqoon badan yahay ee soo qaado koorso aqoon kororsi waxaad u baahan tahay in aad dib u cusbooneeysiisid aqoontaada, waatii oow baxay **waxa lasoo baray waxeey u badnaayeen dhinaca dhaqaalaha**

Doonta eey dadka saarnaayeen waxeey kusaab san tahay dhaqaale . Kiro ayaa lagu soo raacay weeyna cusbooneeyd.

Daar duqoowday dhis ayaa layiri si loo bad baadiyo Dahabka ku hoos duugan.

waxaa ladilay wiil mustaqbalka noqon lahaa caasi waalideen .caruur badan oo waxaa jirto Xabsi daa`in lagu xakumay denbiyo eey galeen darteed ama dil lagu xakumay Wadan uma faa`iideeynin kuwaas Waalidna waa ku qasaaray [Rabi Caruurta baari ha uga dhigo Somalida]

Cusbooneeysiinta aqoonta

(PC. Office 2007, Office 2010) hadii waagii hore aad is tic maali jirtay 2007 marka oow soo baxay 2010 Softiweerka ah waxaad ku qas ban tahay in aad soo baratid sida ugu wanaagsan ee loo istic maali karo kaas cusub ee suuqa la soo geliyay.

Aqoonta hadii aan la cusboo neeysiin maxaa dhacayo?

shaqo la`aan ayaa dheceeyso sanadka marka oow ahaa 1700.M.waxaa jiray dad ka shaqeeyo

Maktabada hoowsha eey qabtaan waxeey ahaan jirtay

Kutubada ayee qori jireen

Gal ayeey u sameeyjireen Koolo(Xabag) ayeey marin jireen , markii eey soo baxday Makiinada wax lagu daabaco wax walba waa oow fudu daaday dad badan oo Maktabada ka xamaalan jiray ayaa ku shaqa beelay lkn Dad weeynaha waxaa usoo raqiisay Buugaagtii eey qarashka badan ku bixin jireen waayo 10 Buug meesha laga soo saari jiray bishii 100 Buug ayuu soo saasaarayaa Mishiinka maalin walba .

---

cilmi baaris Qarash kubixin

Geel jiraha waxaa lasiiyaa sahay ku filan sii socod iyo soo noqosho

marka oow usahan tegaayo si oow usoo sahmiyo Roob mahiigaan ah halka oow kada`ay si xoolaha loogu raro meel

kadaaq roon halka maanta Geela daaqayo kana caafimaad wanaagsan. dhul aan leheeyn ,Gol iyo Shilin caya`yaanka Xoolaha cudurka kurido,

taas waxaa lamid ah marka aan degan nahay Magaalo waxaa lagama maar maan ah in lahelo cilmi baarayaal usahan tago sida ugu wanaagsan ee Dhaqaalaha loo kobcin karo

sida ugu sahlan ee loo yagleeli karo Warshado waa weeyn.

sida ugu sahlan ee loo bad-baadin karo waayeelka si oow usii noolaado marka oow yahay waayeel aan xamaalan karin .

sida ugu sahlan ee loogu heli karo wax yaabaha Nolosha aasaasiga u ah , Biyo nadiif ah Caafimaadkiisa oo ladaryeelo , Guri lagu xanaaneeyo, Koronto nolosha ufududeeyso.

Cilmi tayo leh

aqoon tayo leh sidii loogu heli lahaa caruurta Cilimi waxaa jiro Aduunka aan ku anfeceeynin Aaqirana aan waxba kuu tereeynin

si aqoonta noocaas ah looga bad-baadiyo dhalinyarada .waa in cilmibaarista qarash la geliyaa aqoonyahanka Somaliga ah laf ahaantiisa lagarabsiiyaa.

Cilimi baarista oo aan qarash lagelin = sahaydii oow jizcin kadhigan lahaa Geel jiraha ,oo loo diiday ayeey lamid tahay.

Nabi Muuse

aniga ayaa ugu cilmi badan Dunida marka oow dhahay waxaa la amray in oow sahay qaato oowna soo barto Cilmi, Muuse waxoow yaqiin-saday in aqoonta Rabi oow qeeybiyay sida oow dadka ugu qeeybiyay arzaaqda ayuu aqoontana ugu qeeybiyay , Muuse iyo Ardaygii yaraa Doonyar ayeey raaceen Danbiil ayeey Malaay duban kusii qaateen Dhismo, iyo sida Doomaha loo dayactiro cadaw looga badbaadiyo ayaa lasoo baray.

caruurta qaar in oow Rabi kusiin in eey kuu qeeyr badan tahay

ayaa lasoo baray waayo laga yaabee in oow Nolosha kuugu kadeedo sida maanta Hooyooyin badan oo Somali ah nolosha eey ku sugan yihiin oo kale [Rabi Caruurta baari ha uga dhigee Hooyada Somalida ah iyo Hooyo walba oo Insaan ah]

Nabi Yuusuf ayaa laga soo gaaray wax saadaalinta. Gaal riyooday ayuu ufasiray riyadii

loogu sheegay in eey kusoo fooleedahay Gaajo aad udaran, Roob la`aan xoogan in eey soo socoto ayaa Gaalka Riyada lagu tusay 7 sano in aan wax Roob ah la heli doonin .

bal u fiirso ,Rabi naxariistiisa Gaal ku caasiyay ayuu hadana waxyi dhanka Riyada ah wax ugu sheegay waayo

Gaalka Boqorka ah waxoow masuul kayahay nafleey aad utira badan .

Hooyada hadii eey u naxdo caruurteeda ,Rabi ayaa nooga naxariis badan Hooyooyinka

Gaal iyo Muslim waataas ku Arzaaqo dunida dusheeda .

Nabi Ibraahim ayaa waxaa usoo martiyay nin Gaal ah waxeeyna eheeyd xili habeen ah

Nabi Ibraahim waxoow yiri Gaalyahoow Muslim noqo hadii kale waa kaaxaaraan

in aan kusiiyo waxaad cunto .

in aan kumarti qaado hadii aad rabtid Diinteeyda qaado,

Gaalkii waa diiday waana kategay Gurigii Nabi Ibraahim,

daqiiqado kadib ,Jibriil ayaa uyimid waxoowna ku dhahay Rabi waxoow ku leeyahay "

Ibraahim adoonkeeyga igu gaaloobay 70 sano ayaan siinaayay wax oow cuno , waxoow cabo , caafimaad iyo waxa oow u baahan yahay , 1 habeen ayuu kuu yimid kuna weey diistay in aad marti geliso ,hooy iyo wax oow cuno aad siisid waxaad shardi uga dhigtay in oow Diinta soo galo "

intaas kadib Ibraahim waa baxay waxoowna kadawa tegay Gaalkii , waana soo celiyay oo waa lamarti qaaday Gaalkii

oo yaaban ayaa yiri maxaa keenay in aad ka laabatid go aan kaadii koowaad?

Ibraahim ayaa uga shee keeyay Rabi canaan tii oow canaantay iyo in oow ku qaldanaa in oow shardi uga dhigo in oow Diinta qaato si waxoow cuno loo siiyo ,

gaal kii inta yaabay ayuu qaatay Islaamka.

Nabi Muxamad isagoo sheekada nuucaas ah kaduulayo ayuu dhihi jiray Caa`isho badi Maraqa ee wax kasii reerka nagu dhegan ee Yahuudiga ah .

Arar: tani waa mad- habteena Shaafici ee ku dhisan in loo naxariisto Nafta Rabi abuuray Imaam keena waa Gazaali. Muslim walba maqabo Mad-habta noocaan ah mana lagu qasbi karo Mad-habteena.

#QASIIDO SOONKA & SALAADA.

Allaah Allaah

Samir ruuxa uyeesha.

[Allaah Allaah]

dar Illaah usujuuda .Sunihii Nabi raacshay .sifihii lagu sheegay

Jana waa inuusugnaatay

Suubanoow nabigeena saligiisa ninqaada subcinaaya Qur

aanka sifihii lagu sheegay Jana waa inuusugnaatay.

marka saacu wareego sakaraadku yimaado ninkan toowbada

seegin sifihii lagu sheegay Jana waa inuusugnaatay.

Ramadaanka nin soomay sodonkeeda dhameeyay sakadeedana

dhiibay siduu Saatirba sheegay Jana waa inuusugnaatay.

.. . .Dhamaad.....

[Seynab Cali Baxsan.]

{**Wargelin**: Qasiidooyinka qeeybaha danbe ayeey noogu imaan doonaan kana aqriso kolka aan ka faraxalano dhaqaale kahadalkiisa . Magool + Cumar Aadan & qeeybo badan oo Fanaaniinta Somalida kamid ah ayaan soo qaadanay Qasiidooyinkooda.}

.#SUUQ Fadhiid noqday maxaa lagu daweeyaa?

Suuq caajis marka oow dhaco Dowladaha qaar waxeey sameeyaan

Lacago ayeey Bangiga kasoo buuxiyaan amaah in eey qaataan ayaa loo fasaxaa dad weeynaha

lkn dad markoodii hore Lacag eey utiilay Bangiyada maxeey ku falayaan deen dulsaar wadato?.

Dowlada lugta eey ku leedahay suuq caajiska

Biilasha Dowlada oo kordho waxeey keeni kartaa suuqcaajis

Waayo canshuurta ayeey dadka ku kordhisaa.

Ciidamada oo lakordhiyo & Hubka lagu qalabeeynayo oo dibada laga soo iibiyo .

(ciidanka waa sida wadaadka, masruuf ayuu qaataa lkn canshuur Dowlada kama qaado , qasnada dowlada wax kuma soo kordhiyo. Hubka ma ahan wax suuqa lagu kala iibsado Dowlada ayaa gacanta ku heeyso. lacagta lageliyay Hubka faa`iidadiisa waa in oow cadaw kaa dhiciyaa lkn magaalo kuuma camiro caruurna kuuma korsho dawo manoqdo cudur lagula dagaalamo.)

Tamashlo waziirada iyo tujaarta eey sameeyaan

waxeey hoos u dhigtaa dhaqaalaha ,waayo Hotel qaali ah oo

ladego Doon weeyn oo dalxiis looqaato

Barafuun qaali ah oo dibada laga soo iibsado

waxaasoo dhan suuq caajiska ayeey kordhiyaan .

_____

Canshuurta oo lakordhiyo waxeey dhashaa

Hoos u dhac dhanka bulshada daqliga soo geli lahaa

waayo Ganacsatada marka canshuurta lagu kordhiyo waxeey

hoos u dhigtaa waxa eey soo iibsan leheeyd

Sida aan ognahay Ganacsatda waxeey shaqo siiyaan bulshada .

Marka eey shaqo helaan waxaa laga qaadaa canshuur.

_____

Wax soo iibsiga dhanka dibada ah hadii oow yaraado

Waxaa isna yaraado waxyaabaha dibada loo iibgeeyo

Waayo dunida waxeey ku dhisan tahay aan wax is dhaafsano.

 # Magaalo maxaa ugu muhiimsan Nolosha maanta

Magaalooyinka aan maanta ku nool nahay maxaa nolosha asaasi u ah?

Biyo, Koronto, Raashiin ,

3 daas ayaa ugu muhiimsan magaalada hadii canshuurta lagu kordhiyo kuwaas aan soo sheegnay = shacabkaas waa ladhuun qabtay waxeey ku qasban yihiin in maalintii

1 mar laqubeeysto dadka qaarna eeysan qubeeysan Biyo la aan darteed,

dadka qaar in eey Feeynuus iftiinsadaan habeenkii Korontada oo maqan darteed, Isbitaalada in eey shitaan Matooro u gaar ah waayo Koronto leesku haleeyn karo 24 saac aanan dameeynin majirto. bukaanka oo Qaliin ku socdo PC-ga hoowsha lagu

waday waadamay ama Iftiinkii ayaa lawaayay sidaas caqli ma ahan.

Raashiinka hadii canshuurta lagu kordhiyo waxa ka dhalan karo qofwalba waa garan karaa

Rootiga ayaa qaali noqonayo iyo Canjeerada Burka laga dubo Subaxii , Qudaartii ayaa sare ukaceeyso ,Hilibka waa lamid natiijada kadhalan karto waa Noloshii Magaalada in eey cirka isku shareerto ,Shidaalka xitaa hadii oow yahay barmiilkii $30 wax eey soo kor dhineeyso majirto taas waayo Korontadii ayaa lagugu qaaliyeeyay .

#Nolol raqiis ah mar walbo Dowlada dan uguma jirto

Canshuurta hadii aan lakordhin Wado lama dhisikaro, Jaamacado , Garoomo eey Kubada ku ciyaaraan , Deked la dayactiri karo majirto ama Suuq weeyn oo 500 Jiingado kasameeysan .[2014]

.

 # qaab dhaqanka Dowlad iyo Qoowska

Dowlad waxaan dhahnay waa sidii Qoows meel degan oo kale horumarka qoowska waxaa laga fiiriyaa meeqa guri ayeey dhisteen?.

-ganacsi maxeey leeyihiin ?.

-wiilasha iyo gabdhaha wax mala baraa?.

-marka eey caruurta bukooto daryeel caafimaad ma helaan?.

-marka oow guursanaayo wiilka malagu taageeraa in oow noqdo mid meel degan, leh hanti ugaar ah lana tartami karo asaagii ?.

-Qoowska mayahay kuwo kasoo baxo kaalintii waalidka lahaa marka eey duqoowaan mahelaan daryeelkii eey u baah naayeen . daryeel caafimaad, Biyo , Nal ,Guri nadiif`ah mise waa reer Ubadkii eey dhaleen wada caasigaroobay?.

-mayihiin kuwo aaminsan in eey yihiin Walaalo, Diintana eey

fartay in eey isxiriiriyaan ?.

-mayihiin kuwo waalidkood sadaqo ubaxsho , Hilib qeeyriin (ceyriin) ama mid bisil

Lis iyo loog hadba wixii tabar ah ama Quraan loo aqriyo .

Diinta waxeey ka dardaarantay in qoowska meel wax dhigto , sidaas waxaa lamid ah in Dowlada eey leedahay keeyd eey ku bad-baadin karto kuwooda tawaaloowbay ,danta iyo diifta eey ka muuqato

sida aan ula dar-daaranay Qoowska ayaan ula dan leeyahay in eey u fekeraan Dowladaha , wadaadkana halkaas hakasii anba qaado Fiqhiga Islaam-nimo ee faca weeyn .

.******

 # miizaaniyada reerka sida loo kordhiyo

reer walba waxa oow leeyahay qarash oow ugu tala galay in oow ku noolaado qarashaka dadka qaarna maba heestaan waa

wax suuqa laga keeno marna lasoo waayo marna lahelo . dadka aan waxba faro ku heeynin kuwaas la hadli meeyno maanta ee waxaan wax uqoreeynaa dadka qarashka Rabi siiyay Nabigeena inta oowsan geeriyoon wax yar ka hor suuqa ayuu tegi jiray wax walba oow reerka u baahan yahay jumlo ahaan ayuu usoo iibsan jiray . dadka qaarna waxeey sheegaan in 1 sano waxa reerka kufilan in oow guriga soo dhigi jiray .

anaga oo ku deyaneeyno Nabigeen waxaa wanaagsan in sanad walba bilowgiisa qarashka reerka ku bixi lahaa meel loo dhigo wax yaabaha quutul daruuriga .

reerka waxa ugu muhiimsan iyo caruurta wax yaabaha eeysan ka maarmin.

Miizaaniyada reerka sida loo kordhiyo(2)

reerka hadii oow leeyahay 1 albaab kaliya oow dhaqaale ka helo, sida Dukaan yar ama 1 wiil oo suuqa uga soo xamaalo, waxaa wanaagsan in la badiyo ilaha dhaqaalaha reerka sida

iyada oo lasameeynayo

Guryo inta ladhiso dad laga kireeyo lacagna eey reerka kasoo gasho halkaas.

Bacadle , Baabuur, Doon kaluumeeysi, Beer weeyn oo wax soo saarleh, Warshad wax soo saarto sida Toornada Birta qorto, shirkad saami loogu daro reerka.

waxaas aan kor kusoo xusnay ayaa uwacan reerka in oow qarash kubixiyo si miizaaniyada reerka ee sanadlaha ah kor loogu qaado .

hadii aad kobciso meelaha reerka qarashka kasoo galo

1 meeshii oow ka ahaa 4 ama 5 meel aad ka dhigto taas waxeey kor u qaadeeysaa

dhaqaalaha reerka Nabiga waxoow yiri" gacanta sare ayaa ka qeeyr badan mida hoose"

ilaha reerka qarashka kasoo galo hadii labadiyo faqri ayaa reerka laga bad-baadiyay

iyo in eey gacanta hoose noqdaan .

Nabi Ciise qoomkii loo soo diray waxaa loo diiday in maalinta Sabtida ah eey kaluumeestaan

 xeelad ayeey sameeyeen God ayeey kaqodeen xeebta si kaluunka usoo galo maalinta Sabtida ah maalinta Axadana eey kala soo baxaan taas waxeey eheeyd xeelad xaaraan ah lkn Islaamka Diinta laguma dhibin wax yaabaha xaaraanta ah waa fara kutiris aan u baah neeyn in Kutubo badan laga qoro. xeeladii eey layimaadeen Nabi Ciise qoomkiisa waxeey eheeyd in ilaha reerka dhaqaalaha kasoo galo labadiyo , lkn si xaaraan ah ayeey ku raadiyeen mana banaana taas .1god kama qodin xeebta ee dhoowr god ayeey ka qodeen si hadii mid wax ugu dhiciwaayaan kan kale Malaay uga buuxsamo .

 ruuxa Muslimka ah waa in oow qaataa Xigmada meesha oow ku arko.qoomkaas hadii si qaldan eey wax ku raadiyeen anaga

waxaa nala gud`boon

in qaladka iska ilaalino lkn xigmadooda aan qaadano ee ah kobci ilaha dhaqaale ee reerka.

marka dhaqaalaha reerkaada oow kobco Somali oo dhan dhaqaalaheeda ayaa koboc sameeynayo shaqooyin ayaana halkaas ka abuurmayo horumarka reerkaada ruux walba ayeey horumarkiisa tahay.

#Sheydaan Badeeco Suuqa keenay, Nabi ciise ayaa lakulmay.

Nabi Ciise ayaa waxaa ka hor yimid Sheydaan oo 5 Boorso, oo casaan ah jiidayo

shekadan ayaana dhex martay

"A= ciise.....B= sheydaan"

A: maxaa kujiro Boorsooyinka aad jiideeysid?

B: badeeco ayaa kabuuxdo waxaana doonayaa in aan suuqa ku iibiyo

A: maxeey kala yihiin badeecooyinka aad Boorsooyinka kusidid?

B:

1..gabood fal (dulmi) waxaan ka iibinayaa madaxda

2.. kibir iyo isla weeyni waxaan ka iibinayaa maalqabeenada

3.. xaasid nimo waxaan ka iibinayaa wadaad iyo culumo

4.. qiyaano waxaan ka iibinayaa shaqaale & kan loo shaqeeyo

5.. dhagar waxaan ka iibinayaa Dumarka.

#SHIDAALKA , Isticmaalka ,shacabka

3 reer ayaa deris ahaa

waxeey ahaayeen 3 Qabiil .

1aad waxeey istic maali jireen 1000 kii ruux maalin walba

100 fuusto Shidaal ah

Shidaalka oo raqiis ah ayeey sidaas ugu suura gashay

Wadooyin waa weeyn ayeey lahaayeen badanaa waxa eey isticmaali jireen Gaari qof walba uqaas ah

Tareen ama Bas ma raaci jirin shaqsi walba waxoow shaqada ku aadi jiray Gaari oow isaga leeyahay, warsahdii 24 saac ayeey shaqeeyn jirtay wax soo saarka ayaa aad usareeyay

Guryaha, qaboojiye iyo qalab Koronto ku shaqeeyo ayaa u yaalo .Gobolada aadka u dhaw iyo kuwa aadka u fog waxaa loo raaci jiray Diyaarado waayo Shidaalka ayaa raqiis ah Tareen ama Bas looma raaci jirin.

nolol raqiis ah ayeey ku noolaayeen dhanka maciishada ,sidoo kale mushaharka oow ruuxa ku shaqeeyo waxeey ahaan jirtay qiime aad usareeyo Lacag adag ayuu soo heli jiray ruux walba.

2aad.....1000 kii ruux waxeey isticmaali jireen 60 Fuusto - shidaal ah maciishada qaali ayeey ku eheeyd Guryahana weey

sareeyeen kiradooda ,dhismahooda ma sahlaneeyn qarashka kubaxayo

_____

3aad..... 1000 kii ruux waxeey is ticmaali jireen 10 Barmiil oo shidaal ah nolol adag ayeey ku noolaayeen waayo Koronto kufilan ma heli jirin Dowlada ayaa kabi jirtay ,shacabka, dhanka , Cuntada , Dawooyinka , Guryaha. lkn mudo kadib waxeey noqdeen kuwo gaaray isku filnaasho dhanka Nolosha ah .

_____

#Baqeeyl iyo Damaac keebaa`daran?

Baqeeyl waa ninkii hantidiisa kuu diiday lkn Damaac waa kan hantidiisa aan kusiineeynin,

damac kaqabo in oow taadana kudarsado

waa ruux xoolahiisa ku fara adag kuwa dadkana jecel in oow lawareego.

waa dhaqanka eey Hooyooyinka Somalida caruurtooda ku barbaariyaan

Banooniga (Kubada)iska sii waa kaa yaryahay wiilka maalin walba hadii sidaas lagu abaabiyo Wiilka ooyin laga ilaaliyo ilintiisa yaanan arkin iyadoo dhabankiisa kutaalo dhaqanka nuucaas ah Hooyada leh waa in eey ogaataa in wado qaldan eey ujeexday Wiilkeeda

beri marka oow madax noqdo Naagta qurxoon ayuu wiilasha ka furan doonaa

tii dhaban cas aniga ayeey igu fiicantahay ama kan iga agdhaw. Ganacsi hadii oow magaalada soo galayo ama oow kabaxaayo aniga iyo Xisbigeeyga hanaloodaayo dhaqdhaqaaqa magaalada taas natiijada kadhalan doonto waa kacdoon shacab Shacab kacay sida oow u fariisto waqti dheer ayeey qaadaneeysaa .

xadiiska Nabiga waakan

اللهم إني أعوذ بك

من شح نفسي وإسرافها ووسواسها.

واتقوا الشح فإن.

الشح أهلك من كان قبلكم، وحملهم على أن سفكوا دماءهم واستحلوا محارمهم

quraanka

سيطوقون ما بخلوا به يوم القيامة.

" ومن يبخل فإنما يبخل عن نفسه"

kii yiri Baqeeylnimo darteed "maanta waxaan kusigtay in aan waxeeyga wax kacuno" looma baahna noocaas mana loo baahna saqaynimadii Shaafici oo kale isaga oo deeyn lagu leeyahay ayuu dhintay waxoow yiri hebel haloo sheego Meeyd keeyga ha dhaqo , Ninka Meeyd keeyga ha dhaqo oow leeyahay waa nin Masar aanan joogin meel kale ayuu safar ugu maqnaa markii oow yimid ayaa la dhahay Shaafici waa dhintay waxoowna ka dardaarmay in adiga aad meeydkiisa dhaqdid,

ninkii waxa oow yiri yaa Deeyn kulahaa Shaafici ? dardaaran

kiisaas waa ,suuldhabane , waxoowna ula jeeday hebel

deeynka ha iga gudo .

[hadii aad jeceshahay Shaafici qeeybaha hoose ka aqriso qisooyin kusaabsan Xerta shaaficiyada+ Abuu Xaniifa+ Abuu Xasan Al ashcari+ Imaam Al Gazaali.]

.# Maah maah-yo dhaqaale

-Guusha Ganacsiga Kedis kuma timaado

-Dad waxaa ugu liito ma toshe ma tashiishe

-Dawarsato dariiqay ku collowdaa

-Ammaano cirkaa diiday, oo dhulkaa diiday, oo Aadmi baa

qaatay.

-Arrad waa dan uskagse waa doqonniino

-Adhi jiri ma kala abaal waydo.

-Ama faro dufan leh ku qaad ama faro dac leh.

-Bawdo rag, maalinba midbaa qaawan.....= Aduun sadaxan]

-Beerka jecli, xaydha jecli

-Bililiqo doon waa nabad diid.

-Biyo sacabbadaadaa looga dhergaa.

-Caano yar iyo ciidan yarba marka la waayo ayaa la tebaa.=$100 ,boqol kuugu yar marka aad weeydo ayaa la tebaa.

-Ceesaan ninkii weyddiinteda kugu dhiba kaxaynteedaa lagu dhibaa.

-Cudud caano gaabsheen cagaar ma korsho…….[Wiil Caanahii lasiin lahaa , adeer kacabay ciyoow makoro.]

-Kumi ninqaatay keeni maayo kamana maarmo kii lahaa

-Deen Xamar aa ku dhisan

-Beec-mushtar bilaawgiis bur iyo bejiye waaye.

-Malaay banaan ma yimaad, maqaalin naa keentaa

-Muraadkiis heloow meel dheer aas kaa maraa(Deen ninkii aad

siisay dariiqa aad degentahay masoo maro)

-Saaxiibkaa Hadii Barfuun Aas Gadaayo waa kaa soo carfaa

• Ma rabtaa raqiis ma qabtaa qaal

• Mininkeeyga iiga bax & Maalkeeyga i sii meel loo moodo male

• Wax wallaaloow lagu waayi waryaa hooy ma lagu helo.

• Nin is hinjiyay aa la xambaaraa(nin qado heesto aa quraac loogu daraa)

• Hunguri weyni malaay aa saab ugu dhacay

• Ninkii is xarakeeyaa la xurmeeyaa

• Cirbad aruurtay masaar

• Tuuge lama tuugo taajirkaa loo tegaa

• Wallaalkaa dheeftiisa dhegtaa raaxadeeda Waaye

• Bun la waayi badelkis mala waayo

• Fal xaasid faqiir wax heli.

• Baahanoow,baqti kuu bannaan.

• Xaaraanta xushmeeye xawaal ma xassuusto

• Dhoorsadaa dhammaan baxay=xoolo xaaraan looga shakiyay kafogoow aa qeeyr kujiraa.

-Ammaano kugu raagtey inaad leedahay baad mooddaa.

(uqaado ,Islaanta sheqa waaniday ee ku xusan Buugan)

.#..... sadax aa jiri-jirtay

Bulshada reer Banaadiriga waa dad kaftan badan Ganacsiga ku caan baxay

Marka Sanadka oow dhamaado weey Shiraan waxeeyna lee yihiin xigmad ladhahaayo sedax leey

Waxaa leeskugu sheegaa wixii cusub ee sanadkaan ku soo ziyaaday Suuqa,

Ganacsatada waxeey kusoo bandhigi jirtay wixii eey suuqa soo geliyeen sanadkaas ,

Xayeesiin weey tahay ,fagaare alaabtaada keen halagaa iibsadee

,iyadana weey noqotaa ,

"Berigii bannaan baxaayo Buurfuulaa ka bilaabaa."

Maansadii sedax leey

Qaabkaan ayeey u egtahay waxa eey isku sheegaan maalinta ciida,

hoos ka aqri, qaab qoraalkooda

-Bur aajiri jiray Bejiye aa lajiri jiray Caana-barawe aa cusub

-Bas aa jiri jiray ,Caasi aalajiri jiray (Hoomeey) Xaajiyo qamsiin aacusub

-Naag aajiri jirtay Nin aa lajiri jiray ,Reer qaansa roobaad aa cusub(Lagarone yaasha Rag& Dumar)

-Geber aa jiri jirtay Garoob aa lajiri jirtay Geesxir aatimid.

-Dukaan aajiri jiray Dabakaayo aa lajiri jirtay Dulkabanaan aatimid(Nin Jaakad wato wax walba eey kuraran yihiin,

Shaanbo, Uunsi ,Malmal, Xabag-kedi, Joos & Cuud .iwm .)

……

shirib Afareey la dhaho ayaa jiro marka Sanadka la gaaro waa leeysku soo shirbaa

Nuxur-kiisa waa aan kuu faano .

Qolo degto Nuur-dugle ayaa loo soo shiribay

“*Nimanki Nalki yaa nehee reer Nuurdug-loow manawadaa*?"

Waxeey ku faaneenn in Tuuladooda Nal ka shidan yahay .

waa loo jawaabay waxaana layiri

"*Fiila kuduuban fiid Sarmaan, weli Fiidiyoow maku fiirsateen*?"

Nal ayaad ka hadasheen TV ayaa Tuuladeena laga hirgeliyay!.

Sheekadaas waxaa lamid ah

Bulshada degto BOOSAASO iyo Bari

markii oow cusbaa Tooshka habeenkii la iftiinsado

Wiil ayaa Gabar soo doontay ilbaxnimadiisa in oow muujiyo

ayuu rabay

Toosh ayuu soo iibsaday si oow uga tilmaanaado Wiilasha kale . markii oow doontay gabadha waxeey ku jawaabtay "Kar buuna-loow kumee"

Waxeeyna ula jeeday ruux kale madoonayo adiga Tooshka sito ayaa dhalinta kaa jecelahay .(layaab maleh. hada laga yaabee Telfoon cusub in oow suuqa kasoo iibsado ama usoo iibiyo gabadha si oow iskaga dhiso dhanka ehelkeeda)

Somalida waxeey dhaqan u leedahay marka sheega cusub yahay hadal Xigmad leh ayeey ka tiriyaan meel walba ha joogeen.

Hargeysa

Boorka Xayeesiinta (iidheh) waxaa lagu qoray

"Ruux kaligii isla hadlayo hadii aad aragtid hamoodin in oow waalan yahay Mobil ayuu sitaa(Telfoonka gacanta xiliga uu cusbaa)

Beydhabo

wiil beertiisa ku fooraro ayaa waxaa soo agmartay Mooto

inta oow fiiriyay ayuu kudhawaaqay sidan

"Fidhiiya` lee , la dareerahaye"

waxoow ula jeeday ninka Mootada saaran isaga oo fadhiyo ayuu isla waqtigaana socdaa.= Nin fadhiyoo socdo ma aragteen?.

.#Baar-jilba jabsi

bulshada banadiriga waxa eey ku caanka yihiin waxaa kamid ah Mallaay gaadista qaababkiisa kala duduwan,tollidda Koofiyo Baraawe, farsamada alwaaxda,Alaabada Guryaha lagu dhiso ,Macmac aan sameyska noocyadiisa kala duduwan sida : shuushuumoowga,Icunka,Buskutka & Doolsho noocyadooda, Qaqacloowga, Xariisaha, Kakawle, Shukulaato, Nanac jiidmaaye kakaaye,Qumbo sokor, Sisin sokor, Kashaato, Mushabaq, Nanacgeed karis, Xalwada noocyadooda, sambuuska

asalkiisa, Kabbaab , Kutuleeti,Bajiyaha, Qumbo

shidnaha,Shidniga .iwm.

Sameynta Dharka Aliindiga Kabaha Saandalka Qalin & Dahab

shubbidda .

farsamada Kobaha Saandal, Kooyo-feero, iyo nooc walba oo

Kobo lebis ah

Guryaha, qaabka loo dhiso, Vilo isku genbis ah , Safiito

saarida Guryaha , Lamayeeri Guri kasameeysan ,Dharka

tolliinkiisa Nin & Naag.

---

xigasho: qoraalka ugu danbeeyo ee Banaadiriga looga hadlay & maah-maahyada waxaan kasoo xiganay .
www/shangaani.com.

_____